**Taariikh: 25/05/2024**

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
BIXID
28 MAY 2024
EXIT
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**XEER RA'IISUL WASAARE LR.156**

**SIYAASADDA DOWLADDA EE BARAHA SOOMAALIYEED.**

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qododbka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qododbka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Warqadda summadeedu tahay **WWH&TS/XW/240/05/2024, ee ku Taariikheysan 12/03/2024** kuna saabsan codsi soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada Hiddaha iyo Tacliinta sare.

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW18.75.05.24** ee **23/05/2024,** kuna saabsan ansixinta Siyaasadda Dowladda ee Baraha soomaaliyeed oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Markuu tixgeliyay:** Muhiimadda ay leeyahay Meel-marinta Siyaasadda Dowladda ee Baraha Soomliyeed.

**Wuxuu Meelmariyay**

**Qodobka 1aad**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW18.75.05.24 ee 23/05/2024,** kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Dowladda ee Baraha Soomaaliyeed** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay

**Qodobka 2aad**

**Hirgalin**

Waxaa Wasaaradda Waxbarasha, Hiddaha iyo Tacliinta sare loo igmaday in ay hirgeliso, Meelmarisana Siyaasadda Dowladda ee Baraha Soomaaliyeed

**Qodobka 3aad**

**Dhaqangal**

**Siyaasadda Dowladda ee Baraha Soomaaliyeed** waxa ay dhaqan- galayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka
Xafiiska Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة العدل والشؤون الدستورية
مكتب مدير قسم التشريعات والا تفاقيات

Federal Republic of Somalia
Ministry of Justice and Constitutional Affairs
Office of Director Legislations and Agreements Department

**SUMMAD: WC&AD/XAWSH&H/2005/2024** **TR. 17/01/2024**

Mudane Garyaqaan,

**UJEEDDO:** **SOO-GUDBIN "SIYAASADDA DAWLADDA EE BARAHA SOOMAALIYEED"**

Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, waxay halkan ku soo gudbinaysaa "Siyaasadda Dawladda ee Baraha Soomaaliyeed" oo abuuraysa hannaan maamul oo lagu horumarinayo waxbarasho baahsan, tayo leh oo si wax-ku-ool ah loo agaasimo.

Siyaasaddan oo ay diyaarisay Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare, waxay Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurku ka gudatay waajibaadkeeda sharci ee ku aaddan siyaasadaha sharci.

Haddaba, waxaan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka codsanaynaa inuu waajibkiiska sharci ee ku aaddan siyaasadaha sharci ka guto, si hab-raaca ansixintu u dhammeystirmo.

Wada-shaqeyn wacan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA WASAARADDA CADAALADDA IYO ARRIMAHA DASTUURKA MINISTRY OF JUSTICE AND CONSTITUTIONAL AFFAIRS FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Mudane Xasan Axmed Cali
**Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada,**
**Wasaaradda Cadaaladda iyo Arramiha Dastuurka**

Garyaqaanka Guud ee Dawladda =Muqdisho=
Og: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب المحامي العام للدولة

THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL

**Summad: XGG/029/2024** **30/01/2024**

**Ku: Agaasinka Golaha Wasiirradda** **Muqdisho**
**Og: Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha & Tacliinta Sare** **Muqdisho**
**Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS** **Muqdisho**

**Ujeeddo:** Talo Sharci ku saabsan "SIYAASADDA DAWLADDA EE BARAHA SOOMAALIYEED"

Xafiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo tiixraacaya warqadda Summaddeedu tahay: **WC&AD/XAWSH&H/1005/2024** ee ku taarikheysan **17/01/2024** kana soo baxday Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, ujeedadeeduna ahayd: **Soo gudbin "SIYAASADDA DAWLADDA EE BARAHA SOOMAALIYEED"**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, asaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan Sharci **Lr. 18 ee 29 Jannaayo 1976**, ayaa waxa uu halkaan idinkugu soo gudbinayaa **"SIYAASADDA DAWLADDA EE BARAHA SOOMAALIYEED"** oo ay Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka horay ugu soo gudbisay Xafiiska Garyaqaanka Guud, si uu uga guto waajibaadkiisa shaqo, ugana bixiyo Talo Sharci.

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka diib markii uu darsay Nuqulka Siyaasaddani oo abuuraysa hannaan maamul oo lagu horumarinayo waxbarasho baahsan, tayo leh oo si wax-ku-ool ah loo agaasimo, uuna ku daray Ra'yigiisa iyo taladiisa Sharci. Xafiisku waxa uu ku talinayaa in la saxiixo Siyaasaddani,maadaama aanay ka hor imaanayn dastuurka iyo shuruucda dalka, ka dib marka la dhammeystiro hab-raaca ansixinta.

FG: Waxa halkan ku lifaaqan Siyaasadda Sare ku xusan.

**Wabillahi Towfiiq**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL مكتب المحامي العام للدولة

**Avv. Muuse Axmed Ciise**

**Ku-Xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA
Address: State House, Villa Somalia
Tel: +252 (0)616658489, +252 (0)613242015 | E-Mail: sag@sag.gov.so,

# WASAARADDA WAXBARASHADA, HIDDAHA & TACLIINTA SARE

# SIYAASADDA MACALLINKA

Diseembar 2023

## TUSMO

ORAAHDA WASIIRKA........................................................................................................ i
DULMAR KOOBAN ........................................................................................................iii
CUTUBKA KOOWAAD........................................................................................................ 1
HORDHAC ........................................................................................................ 1
1.1 Nidaamka Waxbarashada Soomaaliya ........................................................................................................ 2
1.2 Helitaanka iyo Tayada Waxbarashada........................................................................................................ 3
CUTUBKA LABAAD........................................................................................................ 4
DIYAARINTA MACALLINKA ........................................................................................................ 4
2.1 Muqarrarka Tababarka Macallimiinta. ........................................................................................................ 4
2.2. Barnaamijka Tababarka Macalimiinta ........................................................................................................ 6
2.3 Shuruudaha Xulashada Macallimiinta. ........................................................................................................ 7
2.4 Diiwaangelinta iyo Ruqsad-siinta Macallinka ........................................................................................................ 9
2.5 Waxbarashada loo dhan yahay........................................................................................................ 10
2.6 Horumarin Xirfadeedka Joogtada ah ee Macallimiinta ........................................................................................................ 11
2.7 Machadyada Tababarka Macalimiinta........................................................................................................ 11
CUTUBKA SADDEXAAD ........................................................................................................ 13
SIYAASADDA MAAMULKA MACALLINKA ........................................................................................................ 13
3.1 Siyaasadda Diiwaangelinta ........................................................................................................ 13
3.2 Siyaasadda Qorista Macallinka ........................................................................................................ 15
3.3 Hawlgelinta Macallinka ........................................................................................................ 16
3.4 Siyaasadda Mushaharka Macallinka........................................................................................................ 18
3.5 Siyaasadda Hogaaminta Dugsiga........................................................................................................ 18
3.7 Siyaasada Anshaxa Macallinkaa........................................................................................................ 20
3.8. Wadiiqaha Kobcinta Xirfadda Macallinka........................................................................................................ 23
3.9 Dawladaha Doorkooda iyo Waajibaadkooda ........................................................................................................ 24
CUTUBKA AFRAAD ........................................................................................................ 26
HABKA DHAQANGELINTA SIYAASADDA ........................................................................................................ 26
4.1 Doorka iskuxirka Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare .......................... 26
4.2. Doorka Wasaaradda Waxbarashada Dawlad Goboleedyada ........................................................................................................ 28
4.3. Doorarka iyo Waajibaadka Daneeyayaasha Waxbarashada ........................................................................................................ 28
CUTUBKA SHANAAD ........................................................................................................ 30
KORMEERKA, QIIMAYNTA, IYO DIB-U-EEGISTA SIYAASADDA ........................................................................................................ 30
GUNAANAD........................................................................................................ 30

LIFAAQYO .......................................................................................................................... 32

## ORAAHDA WASIIRKA

Siyaasadda Macallinka waxaa lagu soo saaray hab wadatashi oo ay ka qaybqaateen dhammaan qaybaha kaladuwan ee siyaasadda dhaqangelinteeda wax ku leh. Qabyaqoraalladii siyaasadda waxaa wax badan ku soo kordhiyey agaasinnada iyo khubarada waxbarashada ee ka hawlgala Wasaaradaha Waxbarashada ee Dowladda Federaalka iyo Dowladaha Xubnaha ka ah. Waxa ay ku timid dadaal iskaashi oo lagu ibafuray ururinta macluumaadka muhiimka ah ee la xiriira macallinka. Si gaar ah, waxaa loo wareystay maamulayaasha, macallimiinta, guddiyada bulshada, hoggaanka sare ee wasaaradaha waxbarashada, hoggaanka macaahidda tababarka macalimiinta iyo bahwadaagta kale ee Waxbarashada.

Sida ku cad qodobka 30-aad ee dastuurka kumeelgaarka ah, waxbarashada aasaasiga ahi waa xaq uu leeyahay muwaadin kasta oo Soomaaliyeed, waxaana Wasaaradda loo igmaday bixinta waxbarasho tayo leh iyo tababbarro lagu abuurayo raasamaal bini'aadan oo lagamamaarmaan u noqda horumarinta dhaqaalaha, bulshada, siyaasadda, nabadda iyo xasiloonida dalka. Siyaasadda Macallinku waxa ay la jaanqaadeysaa qaabdhismeed sharciyeedyada Wasaaradda, Qorshaha Istiraatiijiyadeed ee Waxbarashada iyo Siyaasadda Waxbarashada Qaranka.

Ujeeddooyinka ugu muhiimsan ee siyaasadda macallinka waxaa ka mid ah: cusbooneysiinta cududda nidaamka macallinnimada, xoojinta habraacyada diyaarinta macallinka, iyada oo loo marayo laba wadiiqo oo tayada ka mideysan: (b) tababbarka shaqada ka hor la qaato iyo (t) midka shaqada gudaheeda lagu qaato; iyo in la mideeyo hannaanka diyaarinta macallinka, si loo diiwangeliyo, rukhsad xirfadeed qaranna loo siiyo.

Sida la ogyahay, arrimaha lafdhabarka u ah in la hirgeliyo waxbarasho tayo leh waxaa ka mid ah Manhaj Qaran oo horumarsan, kaasoo la daahfuray 2017kii, la dhammeystiray, fasalladana la geeyey qeybtii ugu dambeysay 2020kii, ka dib markii hannaan wadatashi lala yeeshay dhammaan dadka ay khuseysay. Hase yeeshee, si loo dhaqangeliyo manhajkan waa in la helaa macallimiin tababbaran oo tayo leh, oo si habboon u adeegsan kara Manhajka Qaranka. Iyada oo arrinkaa laga shidaalqaadanayo, ayaa la soosaaray siyaasaddan macallinka, oo ah saab lagu taxay dhammaan habraacyada ku lug leh diyaarinta iyo maamulka macallinka.

Sidaas awgeed, macallimiinta ayaa la diwaangelinayaa oo la siin doonaa rukhsad, kadib marka ay ka helaan shahaadooyinka looga baahan yahay machadyada tababbarka ee ay wasaaraddu ansixisay. Haddaba, waxaan rabaa in la ogaado in dhammaadka sannadka 2025-ka wixii ka dambeeya aan la ogolaan doonin macallin aan sharciyeysneyn ama aan haysan rukhsad xirfadeed in uu wax ka dhigo dugsiyada dalka. Intaa waxaa dheer, in Wasaaradu diyaarisay tababbarro loo fidinayo dadka aan horay macallinnimo xirfadeysan u soo marin. Tababbarkani waxa uu siinayaa macallimiinta aqoonta maaddoyinka ay dhigayaan, waxa uuna ka xoojinayaa xirfadaha barbaarinta lagamamaarmaanka u ah  iyo, sidoo kale, hoggaaminta iyo maamulka dugsiyada.

Ugu dambeyn, siyaasaddani waxa ay soo bandhigeysaa hannaan shaqada macallinnimadu u xuubsiibaneyso in ay noqoto xirfad la qaddariyo oo ku kooban dadka si waafaqsan xeerarka waxbarashada loogu tababbaray. Si kale haddii loo dhigo, siyaasadda macallinku waxa ay horseed u noqoneysaa iskudeyga lagu baadigoobayo waxbarasho baahsan, tayo leh, oo si habboon loo agaasimo. Waxa aan aad ugu rajo weynahay in talloobooyinka siyaasaddan ku jira si feejigan, xirfadeysan oo dhammeystiran loo fuliyo, si'aan u helno macallimiin aqoon, xirfad iyo hufnaan isku darsaday, oo dhaqangeliya Manhajka Qaranka.

Faarax Sheekh Cabdulqaadir.

Wasiirka Wasaaradda

## DULMAR KOOBAN

Macallinku waa udub-dhexaadka bixinta waxbarasho tayo leh oo loo siman yahay. Haddaba, waxaa muhiim ah in dowladdu ay xoogga saarto sidii loo xaqiijin lahaa aqoonta iyo karaanka ay u baahan yihiin macallimiintu, si dadka shaqadan muhiimka ah ku habboon u soo galaan, oo ay ugu nagaadaan xirfadda. Si taas loo gaaro, loona daboolo baahiyaha xirfaddan loo qabo, dowladdu waxay ay go'aansatay in ay si lixaad leh u kordhiso tirada macallimiinta xirfadleyaasha ah; waxa ayna ku billowday tababarka iyo shaqaaleysiinta (3000) saddex kun oo macallin, iyada oo lagu darayo saddex kun sanadkasta si loo baahiyo, korna loogu qaado tayada waxbarashada dalka.

Siyaasaddan qaran ee macallinku waxa ay la jaanqaadaysaa Qaab-dhismeedka Sharciga Waxbarashada, Manhajka Qaranka, Qorshaha Istiraatiijiga ah ee Waxbarashada iyo Qorshaha Horumarinta Qaranka, Waxa ayna weeleyneysaa nidaamka iyo habraacyada qeexaya jawaabta su'aasha ah: "yaa macallin ah ama noqon kara?" Waxaa kale oo ay ifineysaa tababarka macallinka, oo u kala baxa laba nooc: (b) tababarka shaqada kahor; iyo (t) tababarka shaqada gudeeheeda, oo mid waliba leeyahay shuruudo iyo habraacyo u gaar ah. Nuqul siyaasadeedkani, sidoo kale, waxa uu ka kooban yahay tilmaamo iyo soo jeedinno ku saabsan Nidaamka Maamulka Xogta Macallinka, Diiwaangelinta Macallinka, Rukhsad siinta Macallinka, Mushaarka Macallinka, Qorista, Hawlgelinta iyo arrimo kale oo la xiriira shaqaaleysiinta Macallinka. Intaa waxaa dheer, soo jeedin ku saabsan darajooyinka macallinka oo siinaya tilmaamo suurtagal ka dhigaya sidii loo dejin lahaa miisaanka mushaharka iyo heerarka kala duwan ee ay tahay in la eego marka macallimiinta darajooyinkooda la qiimeynayo. Qiimeyntu waxa ay horseedeeysaa helitaanka shahaaddooyinka - mid tacliineed iyo mid xirfadeedba, taas oo ku dhiirigelineysa macallimiinta in ay raadiyaan tababar, si ay kor ugu qaadaan aqoontooda iyo xirfadahooda barbaarineed, islamarkaana wax ugu helaan. Labada cutub ee ugu dambeeya waxay soo bandhigayaan qorshaha fulinta iyo saabka kormeerka iyo qiimaynta.

Aafooyinkii COVID-19 waxa ay na bareen in aan ku qaadano waxbarashada qaab fogaan dersid iyo waliba hannaan iskudhafan oo tababarka macallimiinta lagu bixiyo. Sidaa darteed, hawlaha tababarka macallimiinta mustaqbalka waa in uu qayb ka noqdaa isticmaalka tiknoolajiyadu, si loo fududeeyo adeegga tababarka, gaar ahaan gobollada helitaanka internet-ku u fudud yahay.

Ugu dambayn, tallaabooyinka siyaasadda ee nuqulkan lagu ururiyey waxay u baahan yihiin in la sameeyo qorshe dhaqangelineed oo faahfaahsan, dabagal iyo qiimayn lagu sameeyo tallaabooyinka la soo jeediyay. Sidaa darteed, Xarunta Maamulka iyo Horumarinta Macallimiinta ayaa diyaarin doonta jadwalka fulinta. Agaasimaha Guud iyo Wasiirka Waxbarashaduna fulinta siyaasadda ayey u qareemi, oo agabka loo baahanyahay u fududeyn doonaan, si loo xaqiijiyo in macallimiin tababaran oo tayo lagu xushay ay gaarsiiyaan waxbarasho mustaqbalka u dhista dhammaan ardeyda Soomaaliyeed.

# CUTUBKA KOOWAAD

## HORDHAC

Waxbarashadu waa aalad awood badan oo loo adeegsado horumarka bulsho, dhaqaale iyo wacyi dadnimo; waxaana jira xiriir ka dhexeeya waxbarashada iyo raasamaalka dhinaca dadka ah oo dalka horumarkiisu u baahan yahay. Waxbarashada waxaa loo adeegsadaa in lagu dhimo faqriga, lagu muujiyo sinnaanta, kor loogu qaado nabadda iyo xasilloonida, loona horseedo muwaadiniinta caafimaad iyo horumar. Marka la soo koobo "Waxbarashadu waa aaladda ugu weyn ee lagu baddali karo adduunka". Hadaba, waxaan dib u habeyn ku sameyn doonnaa nidaamkeena waxbarasho, si aan u ballaarino helitaanka waxbarashada, kor ugu qaadno tayada waxbarashada, islamarkaana xoojinno hoggaanka iyo maamulka hufan ee waxbarashada dalka.

Sida aan ka warqabno, macallimiintu waa hantida ugu muhiimsan ee dugsiyada maanta (OECD, 2018). Intaa waxa dheer, manhajkeenna qaran waxa uu u baahan yahay in agabkiisa la geeyo fasallada, tallaabadaasina waxa ay ku xirantahay in la helo macallimiin taya leh oo gudbiya manhajka. In macallimiin han, hufnaan iy tayo iskudarsady lagu soo biiriyo dugsiyadu waxa ay astaan u tahay awoodda maamul, biseyl iyo karaan ee nidaamka waxbarashada. Hadaba, Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare waxa ay ku qanacsantahay in macallimiintu ay udub dhexaad u yihiin tayaynta waxbarashada, waxa ayna u dejisay siyaasad qaran oo lagu diyaariyo, laguna maamulo.

Siyaasadda macallinku waxa ay ka kooban tahay xeerar iyo habraacyo maamul oo loogu talagalay in ay qaabeeyaan, oo horumariyaan macalimiinta dalka. Ujeeddada ugu muhiimsan ee siyaasadduna waa in dib u habeyn lagu sameeyo nidaamka waxbarashada, iyada oo tayada waxbarashada carruurta Soomaaliyeed lagu xoojinayo macallimiin isbedalka la rabo la jaanqaadi kara.

Siyaasadda Macallinku waxay soo gudbineysaa tilmaamo la jaan-qaadaya Xeerka Waxbarashada iyo Siyaasadda Waxbarashada Qaranka, Qorshaha istaraatiijiyadeed ee waxbarashada iyo Qorshaha Horumarinta Qaranka. Siyaasaddu waxa ay, sidoo kale, hagi doontaa gaaritaanka Hadafka 4aad ee Horumarinta Joogtada ah ee Qaramada Midoobay (UNESCO, 2015). Waxa kale oo hagaya himilada, hadafka iyo qorshayaasha Wasaaradda Waxbarashada, Hiddah aiyo Tacliinta Sare. Runtii, waa muhiim in siyaasaddan lagu xiro hayb sharci ama siyasadeed sida aan kor ku xusney, hase yeehee, waxaa iyaduna muhiim ah in aan is weydiinno: horta maanta macallimiin intee le’eg ayaan haysannaa?

Hadda, marka la eego diiwaanka EMIS, Gobolka Banaadir waxaa jooga 9681 macallin, 3612 Koonfur Galbeed ah iyo 1829 Galmudug ah; halka Hirshabelle ay joogaan 1550 oo macallin; Sidoo kale, Jubaland waxaa ka hawlgala 2408 macallin; Puntland waxay leedahay 6511 macalin, halka Soomaaliland ay ka hawlgalaan 13743 macallin. **Marka la’isu geeyo, tirada macallimiinta ka shaqeeya Soomaaliya waxa ay gaareysaa 39,334 macallin**. Hase yeeshee, tirada kor ku xusan ma buuxinayso baahida hadda jirta ee ardayda wax ka barata dugsiyada Hoose-dhexe iyo Sare ee dalka oo dhan. Tirada yar waxaa ka daran tayada oo iyaduna hooseysa.

Caqabadaha dhanka tayada ah ee ugu waaweyn waxaa kamid ah in macallimiinta ay ka maqan yihiin xirfadaha barbaarinta iyo aqoonta maaddada, taas oo macnaheedu yahay in tani ay saameyn taban ku leedahay, kuna yeelan doonto tayada waxbarashada ardayda. Hadaba, si loo yareeyo dhibaatooyinka ka dhashay tirada iyo tayada gabaabsiga ah ee macallimiinta, dowladdu waxay tababari doontaa tiro macalimiin ah lixda sano ee soo socota. Tababarkan, waxaa mudnaan lagu siin doonaa bareyaasha aan u tababarreyn macallinnimada, si kor loogu qaado xirfadahooda waxbaridda iyo bixinta maaddooyinka. Sidoo kale, wasaaraddu waxa ay shaqaaleysiin doontaa 20,000 oo macallin ka hor dhammaadka sannadka 2026, iyaga oo islamarkaana tababar xirfadeed loogu fidinayo shaqada dhexdeeda.

Tirada macallimiinta tababran ee lasoo kordhinayo waxaa garab-socda in wasaaraddu ay dib u habayn ku samaynayso Xarunta Maamulka iyo Horumarinta Macallimiinta, waxana ay xoogga saareysaa in la helo waxbarsho lacag la’aan ama la awoodi karo. Wasaaradda ayaa horay u qaaday tillaabooyin billow ahaa oo lagu qiimeynayey dugsiyada dowladda, iyada oo la shaqaaleysiiyay macallimiin, waxaana la geeyay gobolka Banaadir iyo dhammaan dowladaha xubnaha ka ah dowladda Federaalka. Macallimiinta la shaqaaleysiiyay waxay ka diiwaan gashan yihiin Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah si loo ilaaliyo xuquuqdooda iyo duruufuhooda shaqo.
Macallimiinta hadda  shaqeeya iyo kuwa la qori doonaaba waxa ay u baahan yihiin in xogtooda iyo xuquuqdoodaba si xirfadeysan loo keydiyo. Sidaa darted, wasaaraddu waxa ay ku hawllantahay in ay dhidibbada u aasto Nidaamka Maareynta Xogta Macalimiinta (TMIS) oo qayb ka ah Nidaamka Maareynta Macluumaadka Waxbarashada (EMIS) ee laga maamulo xarunta dhexe ee wasaaradda. Nidaamkan xogta macallinku waxa uu wasaaradda u fududeynayaa maamulka iyo taakuleynta macallinka.

Siyaasadda macallinku waxa ay ka jawabaysaa su'aalahan: yaa macallin noqon kara? Waa maxay shuruudaha looga baahan yahay qofka doonaya in uu noqdo macallin dugsi hoose-dhexe ama sare? Sidee loo shaqaaleysiinayaa macallimiinta? Sidee loo maarenayaa macalimiinta dugsiyada dawladda? Waxaa muhiim ah in maanka lagu hayo in siyaasaddani ay ku saabsantahay macallimiinta dugsiyada hoose-dhexe iyo sare oo kali ah, oo ayna saameyn ku lahayn macallimiinta wax ka dhiga xarumaha waxbarashada dhallaanka, kuwa farsamada iyo jaamacadaha.

Ujeeddada siyaasaddu waa in si tayeysan loo maareeyo cududda macallinka, iyada oo la raacayo hannaan maamul oo wax ku ool ah, in la xoojiyo tababbarka macallinka oo si wanaagsan loo agaasimo shaqaaleysiinta kahor iyo kadibba, iyo, sidoo kale,  in macallinka shahaado iyo rukhsad siintiisa lagu saleeyo halbeegyo muuqda.

## 1.1 Nidaamka Waxbarashada Soomaaliya

Nidaamkeenna waxbarashadu waxa uu si cad u qeexayaa in qof kasta oo Soomaali ah uu xaq u leeyahay in uu helo waxbarasho- ha noqoto mid toos ah ama mid dadban, sida ku cad Dastuurka Ku Meel Gaarka  ah ee Soomaaliya. Nidaamka waxbarashadu waxa uu muujinayaa in ay jiraan

dugsiyo Qur'aan oo mararka qaar lagu ladho waxbarashada dhallaanka; waxbarashada hoose-dhexe; waxbarashada dugsiyada sare; tacliinta machadyada sare iyo jaamacadaha. Sida ku cad siyaasadda waxbarashada qaranka, nidaamku waxa uu ku salaysan yahay hannaanka 4-4-4-4, oo macnahiisu yahay in ardaydu ay ku qaadan doonaan afar sano dugsiga hoose, afar sano dugsiga dhexe iyo afar sano oo dugsi sare ah; halka macaahidda Shareecada iyo kuwa farsamadu ay qaadan karaan 3-4 sano. Intaa waxaa dheer, helidda shahaado jaamacadeed waxa ay qaadaneysaa afar sano, marka laga reebo sannadka gogoldhigga ama aasaaska ah si loogu diyaariyo ardayda la qabsashada waxbarashada tacliinta sare.

## 1.2 Helitaanka iyo Tayada Waxbarashada

Wasaaradda waxaa ka go'an in ay kordhiso diiwaangelinta ardayda Waxbarashada Aasaasiga ah. Waxaa kale oo ka go’an in ay sare u qaaddo tayada waxbarashada, si loo xoojiyo miradhal aqooneed oo wax ku ool ah. Tirada ardeyda dalka wax ka barata oo maalinba maalinka ka dambeeya sii kordhaysa ayaa ku riixeysaa dawladda in ay tababarto, shaqaaleysiiso, oo ay u qeybiso macallimiin tayo leh qaybaha kaladuwan ee dalka. Mustaqbalka dhow, dawladdu waxa ay qorshaynaysaa in ay qorto macallimiin badan, si loo daboolo kororka la filayo ee ardeyda. Agabka manhajka, sida buugaagta carruurta iyo hagayaasha macallinka ayaa loo qaybin doonaa dugsiyada intooda badan, si loo dhimo saamiga ardayda aan buugaagta haysan, iyo in kor loo qaado akhris-qoraalka, akhris xisaabeedka, iyo habdhaqanka waxbarashada joogtada ah.

Si loo gaaro ballanqaadkan, dowladdu waxa ay:

1. U gudbineysaa agabka manhajka dhammaan dugsiyada dawladda, si loo gaaro saamiga buugaagta-ardayga oo hooseeya, korna loogu qaado xisaabta iyo akhriska. ·
2. Dhiseysaa fasallo cusub ama dib u habeyn ku sameyneysaa kuwii hore, kadib markii uu si taxaddar leh u qiimeeyo injineer ay ansixisay wasaaraddu.
3. Kobcineysaa oo taageereysaa Waxbarashada Dhallaanka iyo Dugsiyada Qur’aanka ee isku dhafan; iyada oo lagu tababarayo macalimiintooda cilmiga barbaarinta iyo daryeelka caruurta.
4. Hirgelineysaa tiro dugsiyo Qur’aan ah oo iskudhafan marka la gaaro Sebtembar 2024.
5. Dejineysaa istiraatijiyad lagu hormarinayo waxbarashada socdaalka ah ee xaaladaha degdega ah.
6. Hagaajineysaa hannaanka mushaar siinta macallimiinta, iyada oo lagu talagalyo duruufaha dhaqaale ee isbeddalaya iyo sicir-bararka joogtada ah ee dalka ka jira.
7. Horumar xirfadeed oo joogta ah u fidineysaa macallimiinta tababran ee shatiga haysta si tayadooda loo sii xoojiyo.
8. Ka saareysaa nidaamka waxbarashada dhammaan macallimiinta aan xirfaleyaasha ahayn.
9. U fidineysaa macallimiinta aan shahaado waxbarid haysan koorsooyin tababar ah, iyaga oo shaqada ku jira. Marka tababarka iyo shuruudaha kale ay buuxiyaanna siineysaa rukhsad xirfadeed kuna dareysaa nidaamka macalliimiinta rasmiga.
10. Dijineysaa oo dhaqangelineysaa Nidaamka Maamulka Xogta Macallinka. Nidaamkani waxa uu fududayn doonaa horumarinta, qorshaynta iyo hawlgelinta macallimiinta. Dhammaan dawlad goboleedyadu waxa ay heli doonaan marin ay ku galaan xogta macaalimiinta dawlad goboleedyadooda. .

# CUTUBKA LABAAD

# DIYAARINTA MACALLINKA

Si macallinka loogu diyaariyo ka hawlgelidda fasalka, waa in laga hormariyaa qaab-dhismeed manhaj oo tababarka macallinka haga iyo muqarrarkiisii oo la ansixiyay. Arrinkaa waxaa lamid ah in la diyaariyo macaahid tababara macallinka oo si wanaagsan loo maamulo, kuwaas oo ay ka hawlgalaan tababareyaal aqoon iyo khibrad leh. Sidoo kale, waa in ay jiraan shuruudo lagu xusho macallinka soo galaya xirfadda. Waxaa intaa dheer, in la hubiyo in dadka tababarka macallinnimo qaatay si miisaaman loo qiimeeyo rukhsad-siinta kahor, iyaga oo laga fiirinayo in ay dhammeystireen maaddooyinkii looga baahnaa, oo ay ku jiraan maaddooyinka Waxbarashada Baahiyaha Gaarka ah iyo kuwa layliga macallinka tababarka ku jira (practicum). Dhammaadka tababarka kadib, macalimiinta cusub ee la aqoonsaday waa in ay maraan muddo daadihin iyo hagitaan oo laba sano ah; labadaa sano macallinku waxa uu ku jirayaa tijaabo ah oo uu kula qabsanayo hawlaha macallinnimada. Labada sano gudohooda, macallinka waxaa taageeraya maamulaha dugsiga ama macallin khibrad leh oo lagu lifaaqay. Marka macallinka cusub uu dhammeeyo labada sano, oo maamulaha dugsiga iyo maamulka waxbarashada deegaanku ay ku qancaan aqoonta iyo xirfaddiisa kadib ayaa si buuxda loo guddoonsiinayaa shati ama rukhsad xirfadeed oo uu dalka kaga shaqeeyo qiimeyn ballaaran kadib.

Muddada tababarka macallinnimada dugsiga hoose waa laba sano oo ***diploma*** lagu qaadanayo. Hase yeeshee, waxaa lagu soo uruurin karaa hal sano haddii la tababarayo dad jaamacad horey u soo dhammeeyey oo tabarkoodu u badan doono aqoonta iyo xirfadda macallinnimada, waxaana la guddoonsiinayaa ***diploma sare*** marka ay buuxiyaan shuruudaha. Muddada tababarka macallinnimada dugsiga sare waa afar sano, oo lagu qaadanyo shahaaddada koowaad ee waxbaridda. Macallinka loo diyaarinayo dugsiga sare waa in uu ku takhsusaa laba maaddo oo kala fudud (major & minor). Intaa waxaa dheer, in macallimiinta cusub dhammaantood ay marayaan waxbarid layli ah oo macallimiin khibrad leh oo loo xilsaaray korjoogteynayaan.

**Baaxadda Siyaasadda**

Siyaasaddani waxa ay khuseysaa dhammaan macalimiinta wax ka dhiga dugsiyada hoose/dhexe iyo sare ee dalka. Waxa ay, sidoo kale, khuseysaa kuwa wax ka dhiga xarumaha Waxbarashada Sidkan. Hase yeeshee, siyaasaddani ma taabaneyso macallimiinta xarumaha waxbarashada dhallaanka iyo dugsiyada Qur'aanka, in kasta oo macallimiinta wax ka dhiga dugsiyada iskudhafan ee Qur'aanka iyo macallimiinta hoggaamiya Wabarashada Dhallaanku ay hoos iman karaan dhaqangalka siyaasaddan.

## 2.1 Muqarrarka Tababarka Macallimiinta.

### 2.1.1 Maangalka Siyaasadda

Muqarrar taya leh oo la ansixiyay ayaa lafdhabar u ah barnaamijka tababbarka macallinka. Haddii aan la helin barnaamij tababar oo si taya leh loo agaasimay, oo uu ku jiro muqarrarka rasmiga ah ee tababarka macallinmiinta, waxa ay u badantahay in arrinkaasi saameyn taban ku yeesho

waxqabadka macallimiinta layliga ku jira, waxa uuna wiiqi karaa tayada guud ee waxbarashada dalka.

### 2.1.2 Murtida Siyaasadda

Dhammaan machadyada lagu tababaro macallimiinta ee Soomaaliya waa in ay si dhammeystiran u hirgeliyaan barnaamijka tababbarka macallimiinta ee qaranka iyo muqarrarkiisa la ansixiyey.

### 2.1.3 Tallaabooyinka siyaasadda

Si loo dhaqangeliyo siyaasaddan, Dowladda Federaalka waxa ay adeegsanesaa tabaha soo socda:

1. Diyaarinta ama cusboonaysiinta manhaj faahfaahsan oo ay isticmaalaan dhammaan machadyada tababarka macallimiinta bixiya oo la ansixiyay.
2. Hubinta in muqarrarka la ansixiyay uu waafaqsan yahay Dastuurka, iyo, sidoo kale, qaab-dhismeedka sharci iyo nidaam ee ay ka mid yihiin Xeerka Waxbarashada Qaranka, Siyaasadda Waxbarashada Qaranka, Qaab-dhismeedka Manhajka Qaranka iyo Qorshaha Horumarinta Qaranka.
3. Dib u eegista Manhajka Tababarka Macallimiinta saddexdii sanaba halmar. Dib u eegista ayaa waxaa qaban doona khubaro maaddooyinka iyo aqoonta waxbarashadaba ku xeeldheer oo uu hogaamiyo Agaasimaha Xarunta Horumarinta Manhajka.
4. Hubinta in dhammaan barnaamijyada tababarka macallimiinta ay buuxiyaan shuruudaha aqoonsiga ee ay dejisay Wasaaradda Waxbarashada Federaalka.
5. Hubinta in muqarrarka la ansixiyay loo isticmaalo tababarka macallimiinta shaqada ka hor iyo kuwa shaqada ku jira labadaba.
6. Hubinta in muqarrarka tababarka macallinku ka kooban yahay arrimaha soo socda:
   a. Hadafka iyo ujeeddooyinka barnaamijka tababarka macalimiinta.
   b. Dhammaan maaddooyinka lagu dhigto heerarka dugsiga (hoose-dhexe & sare). Macalimiinta dugsiga hoose-dhexe waa in ay qaataan tababar laba sano ah oo ay ku jiraan laba layli-waxbarasho oo ay kormeerayaan macallimiin xul ah; halka macallimiinta dugsiyada sare ay qaadanayaan shahaado afar sano ah oo leh laba layli-waxbarasho oo lamid ah midka kor ku xusan.
   c. Si ay ugu qalmaan macallinimo, ardayda la tababarayo waa in ay ka gudbaan layliga oo ay helaan shati ama rukhsad qaran.
   d. Duruusta la xiriirta xirfadaha waxbarashada waa in ay kamid noqdaan maaddooyinka waxbarashada - Koorsooyinka cilmu-nafsiga, qiimaynta, barbaarinta, falsafada waxbarashada, maamulka iyo hoggaanka dugsiga, waxbaridda kooban (micro-teaching) iyo maaddooyinka kale ee uu waajibiyay muqarrarka qaranka ee tababarka macalimiinta.
   e. Nidaamka Tayadhawrka waa inuu caddeeyaa habka qiimaynta maaddooyinka.
   f. Dhererka tababarka iyo faahfaahinta qiimaha saacadaha, tirada koorsooyinka, iwm. waa in si cad loo muujiyaa bilowga tababarka.
   g. Dulmarka xilliyeysan ee koorsooyinka waa in si cad loogu qeexaa dukumeentiga manhajka. Machadyada tababarka macallimiinta waa in ay xoogga saaraan maadooyinka ay ka jirto gabaabsigu, gaar ahaan sayniska iyo luqadaha.
   h. Dhammaan Machadyada Tababarka Macallimiinta iyo jaamacadaha soo saara

macallimiintu waa in ay horay u sii daabacaan nuqul caddeynaya koorsooyinka ay bixiyaan oo faahfaahsan.

## 2.2. Barnaamijka Tababarka Macalimiinta

### 2.2.1 Maangalka Siyaasadda

Dadaallada tababarka macallimiinta ee Soomaaliya waxaa soo wajahayey caqabado farabadan tan iyo burburkii dowladdii dhexe ee 1991kii. Iyaga oo ka duulaya maqnaanshaha muqarrar tababar macallin oo la oggolaaday, hay'adaha tababarka macallinku waxa ay qaateen Barnaamijka Xoojinta Awoodaha Macallinka ee afka qalaad lagu soo gaabiyo "SCOTTPS", iyaga oo gacan ka helaya bah-wadaagta waxbarashada oo si firfircoon u taageereysey dugsiyada dalka. Barnaamijkan waxaa loo adeegsan jiray in macaliminta xirfaddooda kor loogu qaado. Hase yeehee, SCOTTPS waxa la ogaaday in aanu ku filnayn baahida xirfadeed ee dalka ka jirta, walina ma muujin natiijooyin la taaban karo. Dhab ahaantii, barnaajikani ma awoodin in uu bixiyo waxyaabaha muhiimka ah ee loo baahan yahay si loogu diyaariyo macallimiinta in ay si taya leh wax u baraan. Intaa waxaa dheer, in tababareyaasha macallimiintu ay ahaayeen tiro aad u yar, badankooduna aan qaab xirfadeysan loogu diyaarinin in ay tababaraan macallimiin.

Duruufahaas adag waxaa uga sii daray in ayna jirin dhiirigelin maaliyadeed oo ku filan ama hannaan horumarin xirfadeed oo loogu talagalay macallimiinta shaqeeya. Xaaladdani waxa ay si taban u saamaysaa niyada macallimiinta hadda shaqeeya, waxayna niyad-jabisaa musharraxiinta suurtagalka ah inay kusoo biiraan xirfadda, taasoo ka dhigaysa macallinnimada xirfad aad u hooseeysa.

### 2.2.2 Murtida Siyaasadda

Dhammaan barnaamijyada tababarka macallimiintu waa in ay siiyaan ardyada aqoonta maaddooyinka, xirfadaha barbaarinta, iyo, sidoo kale, qiyamka iyo hab-dhaqanka Islaamka, si loo soo saaro raasamaalka dadeed ee looga baahan yahay horumarka qaranka.

### 2.2.3 Tallaabooyinka siyaasadda

Si loo dhaqangeliyo siyaasaddan, Dowladda Federaalka waxa ay adeegsaneysaa tabaha soo socda:

1. In lagu dhiirigeliyo shakhsiyaadka kartida macallinnimo ka muuqato in ay ku biiraan xirfadda, lana dejiyo shuruudo adag oo ku saabsan qoritaanka macallimiinta.
2. Iyada oo la xeerinayo siyaasadda maaliyadeed, in dib-u-eegis lagu sameeyo mushaharka la siiyo macalimiinta, si ay xirfaddani u soo jiidato shakhsiyaad ku habboon in ay ku biiraan xoogagga waxbarashada.
3. In lala yimaado tallaabooyin dib-u-habayn loogu samaynayo macallimiinta sidii loo siin lahaa agab, korna loogu qaadi lahaa horumarkooda xirfadeed.
4. In tababar loo fidiyo macallimiin tiro badan, iyada oo la isticmaalayo qaabab iskudhafan, oo leh fogaan dersi, iyo kulmidba (ama hannaan danabeysan iyo mid aan danabeysneyn), si loo daboolo baahida culus ee loo qabo macalimiinta aqoonta iyo xirfadda leh.
5. In xoogga la saaro tignoolajiyada, maadaama macallimiinta looga baahan yahay inay u

adeegsadaan waxbarida iyo barashada.

6. In la hubiyo in musharixiinta u tartamayaa macallinnimada ay dhammeeyeen waxbarashada dugsiga sare- ugu yaraan.
7. Hubinta in machadyada tababarku ay buuxiyaan shuruudo ay ka mid yihiin in ay awood u leeyihiin in ay qabtaan tababar laba sano ah (diploma) oo loo fidinayo macallimiinta loo diyaarinayo waxbarashada aasaasiga ah ama shahaadada waxbarashada heerka koowaad ee jaamacadda (B. Ed); dhismayaal ku habboon oo leh qaybta maamulka, qolalka casharrada, shaybaarrada sayniska, adeegga kombuyuutarka iyo tiknoolojiyadda, garoommada ciyaaraha, iwm.
8. Hubinta in muddadaa tababbarka ee macallimiinta waxbarashada asaasiga ah qaataan ay tahay ilaa laba sano, inkasta oo wax laga dhimi marka Diploma Sare la qaadanyo.
9. Hubinta in dhammaan ardayda loo diyaarinayo macallinnimada waxbarashada aasaasiga ah ay dhammeeyeen, koorsooyinka tababarka xirfadeed ee waxbarashada, iyo, sidoo kale, shuruudaha waxbarashada guud sida lagu faahfaahiyay lifaaqa 1.1.
10. Hubinta in macallimiinta loo diyaarinayo dhigidda dugsiga sare ay dhammeeyaan ugu yaraan barnaamij shahaado waxbarasho (heerka 1aad) oo ay ardaydu ku bartaan laba maaddo oo kala culus (major & minor) oo qaadan kara ilaa afar sano.
11. Inta lagu gudajiro diyaarinta macallimiinta dugsiga sare, musharrixiinta ayaa si habaysan loo xuli doonaa si loo dhimo baahida loo qabo maaddooyinka macallimiintu ku yaryihiin.
12. Hubinta in dhammaan ardayda loo tababaray macallinnimada dugsiga sare ay dhammaystiraan maaddooyinka miisaanka culus, maadooyinka miisaanka fudud, koorsooyinka tababarka xirfadeed ee waxbarashada, iyo, sidoo kale, shuruudaha guud ee waxbarashada, sida lagu faahfaahiyay lifaaqa 1.2.

## 2.3 Shuruudaha Xulashada Macallimiinta.

### 2.3.1 Maangalka Siyaasadda

Inkastoo dadaallo badan lagu bixiyey horumarinta waxbarida, haddana dugsiyada Soomaaliya waxa ay la ildaran yihiin tayada waxbarashada oo liidata. Marka laga tago saameynta taban ee macallimiinta aan la tababarin, xirfadda macallinnimada ayaa, inta badan, la dhutineysa la'aanta shuruudo maangal ah oo lagu xusho macalimiinta mustaqbalka.

### 2.3.2 Murtida Siyaasadda

Macallimiinta mustaqbalka waa in soo xuliddooda lagu saleeyaa shuruudo qayaxan, waana in tababarkooda la mariyaa laba hannaan oo kala ah: mid shaqada ka horreeya iyo mid shaqada lagu dhex qabto. Macallimiinta aan la tababarin ee hadda shaqeeya, ayaa si degdeg ah loo tababari doonaa, iyada oo la adeegsanayo hannaanka ku-tababaridda shaqada dhexdeeda, si kor loogu qaado tayadooda xirfadeed. Tiknoolajiyada ayaa la isticmaali doonaa si looga faa'iidaysto koboca isku xirka internetka ee dalka.

### 2.3.3 Tallaabooyinka siyaasadda

Si loo dhaqangeliyo siyaasaddan, Dowladda Federaalka waxa ay adeegsaneysaa tabaha soo socda:

1. In lagu qeexo habka tababarka shaqada ka horreeya: (b) hubinta in macallinku tabobarka ka qaatay hay'ad tacliin sare oo Wasaaradda Waxbarashada ee Federaalku ansixisey shaqaaleysiinta kahor; (t) in uu buuxiyey dhammaan shuruudaha qasabka ah oo ay ku jirto layliga macallinnimada; (j) in la siiyo shahaado kadib marka uu ka gudbo imtixaanka qalin-jabinta oo kaliya, kadibna loo diiwaangeliyo sidii macallin rukhsad ama shati u haysta in uu ardey waxbaro.
2. In tababarka macallinka loo diyaariyo barnaamij faahfaahsan oo waxbarasho oo loogu talagalay caddeynta dariiqyada tababarka macallimiinta dugsiyada hoose-dhexe iyo sare.
3. In lagu qeexo hannaanka Tababarka Macallinka Shaqada ku jira: marka macallin aan tababarreyn oo wax ka dhigaya dugsiga uu xaadiro barnaamijka tababarka macallimiinta muddada loo cayimay oo ay ku jiraan fasaxyada dugsiga ama waxbarashada iskudhafan oo uu si dhammeystiran u buuxiyo dhammaan koorsooyinka qasabka ah.
4. In la tixgeliyo adeegsiga qaabab waxbarasho iskudhafan oo ay kamid yihiin waxbaridda/barashada danabeysan, casharro fool-ka-fool ah iyo casharro kale oo fogaan dersi loogu talagalay.
5. Hubinta in macalimiinta mustaqbalka ee doonaya in ay tababar u galaan macallinnimada dugsiga hoose-dhexe ay buuxiyaan shuruudahan soo socda:
    a. Waa inuu haystaa shahaado dugsi sare oo leh ugu yaraan 75% ama buundada B+.
    b. Waa in uu ka weynyahay 18 jir, kana yaryahay 50 jir.
    c. Waa inuusan lahayn diiwaan dambiyeed si loo hubiyo in dad hufnaan sare leh oo kali ah ay ku biiraan xirfadda.
    d. Waa in uu ka gudbaa imtixaanka wasaaradda si loo hubiyo ku habboonaanshaha xirfadda.
6. Hubinta in musharrixiinta loo tixgeliyey qaadashada barnaamijyada Tababarka Macallinka ee shaqada lagu dhex qaato ay muujiyaan karti, ballan-qaadna sameeyaan in ay dhammeystirayaan barnaamijka.
7. In la dhiirri-geliyo isticmaalka nidaamka tababarka macallinka ee dugsiga sare ee shaqada ka horreeya. Hase yeeshee, sidoo kale, in la furo isticmaalka dariiqa Tababarka Shaqada Dhexdeeda-ha ahaado mid fogaan dersi ah ama waxbarasho iskudhafan.
8. Hubinta in ardey kasta oo ka qalin-jabiyay barnaamijka tababarka macallinka dugsiga sare uu bari karo ugu yaraan laba maado - mid culus iyo mid kale - qalin-jabinta kadib.
9. Hubinta in macallimiinta mustaqbalka ee doonaya in loo tababaro wax u dhigidda ardeyda dugsiga sare ay buuxiyaan shuruudahan soo socda:
    a. Ka haystaa darajo heer sare ah (Excellent) maadooyinka uu rabo in uu jaamacadda ku barto si uu ugu qaato shahaadada koowaad ee jaamacadda (B.Ed.), oo uu ku noqonayo macallin si buuxda u tababaran oo awood u leh in uu barto maadooyinka dugsiga sare iyo kuwa barbaarinta.
    b. Awood u leh in uu dhigto wax u dhigma barnaamij shahaado jaamacadeed oo afar sano ah oo buuxa oo maadooyinka takhasuskooda ah, kaas oo marka uu dhammeeyo la siin doono shahaadada 1aad ee jaamacadda (B.Ed.).

c. Dhameystirka dibloomada sare ee waxbarashada waxay u furan tahay dadka ka qalin-jabiyay jaamacad, wata  shahaado aan ahayn waxbarasho oo raba in ay u wareegaan macallinnimo. Barnaamijku waxa uu qaadan doonaa 12 bilood oo leh laba maaddo oo la bari karo (major and minor), waxaana ku jira laba layli-macallin oo midkiiba yahay ugu yaraan hal bil.
d. In uu ka weyn yahay 18 sano kana yaryahay 50 sano jir.

## 2.4 Diiwaangelinta iyo Ruqsad-siinta Macallinka

### 2.4.1 Maangalka Siyaasadda

Tirada ugu badan ee shaqaalaha waxbarida ee Soomaaliya ma haystaan takhasus waxbarasho oo la isku hallayn karo. Kama jirto gudaha Soomaaliya hay'ad sharci oo loo dhisay in ay bixiso rukhsad waxbarid ama shati macallinnimo. Haddana, waa waajibaadka dawladda in ay xoojiso tayada waxbarashada iyo ilaalinta xuquuqda carruurta dugsiyada dhigata. Sidaa darteed, waa muhiim in dadka loo xilsaaray inay waxbaraan oo daryeelaan carruurta ay helaan tababarka, khibradda, iyo hufnaanta lagama maarmaanka ah, si ay wax u baraan ardayda.

### 2.4.2 Murtida Siyaasadda

Waa in la hubiyaa aqoonta xirfadeed iyo arrimaha looga baahanyahay macallimiinta codsanaya shaqada waxbaridda, waana in xaqiijin lagu sameeyaa machadyada bixiya tababarka macallimiinta.

### 2.4.3 Tallaabooyinka Siyaasadda

Si loo dhaqangeliyo siyaasaddan, Dowladda Federaalka waxa ay adeegsaneysaa tabaha soo socda:

1. Hubinta in macallimiinta tababarka ku jiraa ay dhammaystaan waqtiga loogu talagalay tababarka, oo uu ku jiro layliga macallinnimo ee qasabka ah; waa in ay helaan shahaadado, ha ahaato Dibloomada Waxbarashada ama shahaadada waxbaridda heerka 1aad ee tacliinta, oo kasoo baxday hay'ad tacliin sare oo idman.
2. In la siiyo macallimiinta dhammeysta tababarka waxbaridda rukhsad ama shati ku meel gaar ah oo u oggolaaneysa in ay wax ka dhigi karaan gudaha Soomaaliya muddo 2 sano ah, kadibna qiimayn balaaran lagu sameeyo.
3. In la guddoonsiiyo shatiga xirfadeed heer qaran oo muddo 5 sano ah macallimiinta ka gudba qiimeynta ballaaran ee ku xusan  # 2.
4. In la geliyo faahfaahinta dhammaan macallimiinta shatiga leh Nidaamka Maareynta Xogta Macallinka ee loo soo gaabiyo TMIS, si looga helo tixraac fudud iyo go'aan-qaadasho ku saabsan beddelka, hubinta tayada iyo dallacsiinta macallinka.
5. In xogta macallimiinta shatiga leh lala wadaago hay'adaha dawlad goboleedyada ee u xilsaaran macallinka si loogu adeegsado shaqo-qorista iyo hawlgelinta macallinka.
6. In macallimiinta cusub loo sameeyo daadihin iyo hagid ay hogaaminayaan macallimiin lagu soo xulay aqoon, xirfad iyo hufnaan, si ay u kobciyaan xirfadaha barbaarineed iyo aqoonta macallinka cusub.

7. Hubinta in aan shaqaale waxbarid loo oggolaan in ay wax baraan ardeyda iyaga oo aan buuxin shuruudaha 1 iyo 2 ee sare ku xusan.

## 2.5 Waxbarashada loo dhan yahay

### 2.5.1 Maangalka Siyaasadda

Wasaaraddu waxa ay aaminsan tahay in canug kasta oo Soomaali ah uu muhiim yahay, oo ay ku jiraan carruurta naafada ah iyo kuwa baahiyaha gaarka ah leh. Hadda, maaddooyinka ku saabsan adeegga Baahiyaha Waxbarasho ee Gaarka ah iyo Naafanimada waa ay ka maqan yihiin barnaamijka tababarka macallinka. Wasaaraddu waxa ay isku dayi doontaa in ay qorto khubaro arrimahaas u tababaran si ay u soo gudbiyaan xirfadaha baahiyaha gaarka ah ee looga baahan yahay in lagu baro dugsi kasta oo dalka ku yaal. Si loo ballaariyo helitaanka waxbarashada, Manhajka Tababarka Macallimiinta Qaranka waxa uu xoojin doonaa waxbarasho tayo leh oo loo siman yahay. Ilaa loo arko inay lagama maarmaan tahay, ma jiri doonaan dugsiyo gaar ah oo loogu talagalay Carruurta Naafada ah iyo kuwa baahiyaha gaarka ah leh, sababtoo ah arrinkan waxa uu u muuqan karaa takoorid.

### 2.5.2 Murtida Siyaasadda

Dowladdu waa in ay tababartaa, qortaa, oo hawlgelisaa macallimiin aqoon u leh baahiyaha gaarka ah, waxayna hubin doontaa in Muqarrarka Tababarka Macallimiinta uu leeyahay qeybta tababarka macallinka ee Baahida Waxbarashada Gaarka ah, si ay ugu suurtagasho macallimiinta in ay si taya leh wax u baraan una fahmaan baahiyaha kaladuwan ee ardeyda, kadib marka ay ka qalin jabiyaan macaahidda tababarka macallimiinta.

### 2.5.3 Tallaabooyinka Siyaasadda

<u>Si loo dhaqangeliyo siyaasaddan, Dowladda Federaalka waxa ay adeegsaneysaa tabaha soo socda:</u>

1. Hubinta in muqarrarka machadyada tababarka macallimiinta ay ku jiraan cutubyada baahiyaha gaarka ah si dhammaan macallimiinta loo siiyo xirfadaha aasaasiga ah iyo aqoonta lagama maarmaanka u ah inay si wax ku ool ah wax u baraan una fahmaan baahiyaha kaladuwan ee ardeyda.
2. Dejinta hannaan lagu diyaarinayo kaadiriin khubara ah oo ku tababari doona macalimiinta baahiyaha gaarka ah- heer qaran.
3. Dib-u-eegista, ansixinta iyo dhaqangelinta Siyaasadda Waxbarashada Baahiyaha Gaarka ah iyo Naafada.
4. U tababaridda macallimiinta waxbarashada sidkan adeegsiga aqoonta iyo xirfadaha baahiyaha gaarka ah .
5. Hubinta in shuruudaha xulashada macalimiinta ay isku mid yihiin, marka la eegayo dhanka baahiyaha gaarka; maxaa yeelay, ma jiraan macaahid macallimiin baahiyaha gaarka loo sameeyey kaligood.

## 2.6 Horumarin Xirfadeedka Joogtada ah ee Macallimiinta

### 2.6.1 Maangalka Siyaasadda

Horumarin-xirfadeedka Joogtada ah ee macallimiintu waxa uu sugayaa in macalimiintu ay yihiin kuwo karaan leh, islamarkaana niyaddoodu dhisantahay. Macallimiinta horumarinta joogtada ah hela waxa ay marwalba cusbooneysiiyaan aqoontooda maaddada, xirfadaha la xiriira fasalka iyo isbeddellada ku yimaadda siyaasadda waxbarashada. Cilmi-baaris kaladuwan ayaa caddeyneysa faa'iidooyinka ay macallinka u leedahay aqoontiisa kordheysa. Sidaa darteed, waxbarashadda macalimiintu waa in ay ahaataa mid socota inta macallinku xirfadda ku jiro.

### 2.6.2 Murtida Siyaasadda

Maamullada waxbarashadu waa in ay siiyaan fursado hurumarin xirfadeed dhammaan macalimiinta, iyada oo aan loo eegeyn heerka shahaadooyinkooda iyo goobtooda shaqada, si ay wax u baraan iyaga oo kulansaday lahaansho, karti iyo xirfadlenimo xididdeysatay. Tababarrada hormarinta waa in lagu saleeyaa baahida macallinka, waxaana ugu habboon meel lagu bixiyo dugsiyadooda ama meel aan ka dheereyn.

### 2.6.3 Tallaabooyinka siyaasadda

<u>Si loo dhaqangeliyo siyaasaddan, Dowladda Federaalka waxa ay adeegsaneysaa tabaha soo socda:</u>

1. In horumar-xirfadeedka macallinka lagu daro miisaaniyadda qaranka ee waxbarashada
2. In la dejiyo barnaamij horumarin-xirfadeed qaran oo dhamaystiran, oo ku salaysan baahida dalka iyo halbeegyada caalamiga ah labadaba.
3. In la dejiyo habab hal abuur leh, oo macalimiinta la geeyo meelaha miyiga ama fogfog fursado u siinaya in ay helaan horumarin-xirfadeed joogto ah.
4. In la siiyo macalimiinta wakhtiga lagama maarmaanka ah iyo fursadaha horumarinta xirfadeed, iyaga oo dugsiyadooda ku jira.
5. In la tixgeliyo tababarka goobta si keli-keli ah lagu bixiyo in uu yahay hab wax ku ool ah oo lagu bixiyo talooyinka ku saabsan waxbaridda fasalka. Hase yeeshee, sidoo kale, la oggolaado barnaamijyada horumarinta xirfadeed ee dugsiga iyo degmada oo dhan lagu fidiyo.
6. In la tixgeliyo in lagu daro dhammaystirka horumar-xirfadeedku in uu kamid noqdo shuruudaha dallacsiinta shaqada iyo horumarka mushaharka.

## 2.7 Machadyada Tababarka Macalimiinta

### 2.7.1 Maangalka Siyaasadda

Machadyada tababarka macalimiinta waxaa loo arkaa in ay yihiin laf-dhabarta nidaamka waxbarashada. Waxay soo saaraan macallimiin wax daryeela, u go'ay xirfadda, oo karti leh, kuwaas oo fidiya qiyamka bulshada, iyaga oo bixinaya aqoon, xirfado iyo hab-dhaqan suubban. Hase yeeshee, Soomaaliya machadyada lagu tababaro macallimiinta ayaa la ildaran hiigsi la'aan, dhaqaale xumo iyo la'aanta xeer iyo habraacyo wax ku ool ah.

### 2.7.2 Murtida Siyaasadda

Machadyada Tababarka Macalimiinta waa in ay buuxiyaan halbeegyada waxbarashada sare ee

qaranka. Sidoo kale, waa in ay buuxiyaan shuruudaha waxbarashada macallinka ee siyaasaddan.

### 2.7.3 Tallaabooyinka Siyaasadda

Si loo dhaqangeliyo siyaasaddan, Dowladda Federaalka waxa ay adeegsaneysaa tabaha soo socda:

1. Xaqiijinta in la hirgeliyo muqarrarka tababarka macallimiinta ee la ansixiyay.
2. In la dhiso, lana hawlgeliyo Machadka Tababarka Macalimiinta ee Qaranka
3. Hubinta in tababareyaasha macallimiintu ay haystaan ugu yaraan shahaadada heerka 2aad (MEd) ee tacliinta sare, oo sidoo kale, haystaan ugu yaraan shan sano oo khibrad waxbarid la xaqiijiyay ah. Hase yeeshee, waxaa suuragal ah in tababare shahaadada 1aad ( B. Ed ) ee tacliinta sare haysta, oo aqoon iyo karti ku darsaday ugu yaraan 10 sano oo waayo-aragnimo waxbarid ah loo oggolaado in uu macallimiinta tababaro-haddii loo baahdo.
4. Hubinta in machadyada tababbarka macallimiintu ay leeyihiin goobo hablaha baahiyahooda ku habboon- ha noqdaan macallimiin ama ardey .
5. Hubinta in machadyada tababarka macallimiintu ay muujiyaan awoodda ay u leeyihiin in ay taageero wax ku ool ah u fidin karaan macallimiinta ku jira layliga waxbaridda.
6. Hubinta in machadyada tababbarka macallimiintu fuliyaan siyaasadda waxbarashada loodhanyahay.

# CUTUBKA SADDEXAAD

# SIYAASADDA MAAMULKA MACALLINKA

Siyaasadda maamulka macallinka waxa ay ujeedadoodu tahay in lala socdo dhammaan macallimiinta dalka si kor loogu qaado xirfadda shaqada iyo in laga ilaaliyo caruurta xadgudubyada, waxyeellada ama dhaqannada waxbarida liidata ee aakhirka saameynta taban ku yeelan karta natiijada waxbarashada. Siyaasaddu waxa ay, sidoo kale bixineysaa habraacyo lagu sameeyo diiwaangelin wax ku ool ah, qoris, iyo hawlgelin macallimiin nidaamsan. Taasi waxay keeneysaa in dad badan oo waxgal ah kusoo biiraan xirfaddda, iyo, in ardayda ka qalin jabisay machadyada tababarka ee muujiyey aqoon, karti iyo firfircooni la tuso in la siin doono mushahar soo jiidasho leh si ay u noqdaan kuwo han iyo hammi sare leh. Dawladdu, sidaas darteed, waxay macallimiinta u diyaarineysaa mushaar ku salaysan aqoontooda, tababarkooda, iyo waayo-aragnimadooda si loogu sii hayo xirfadda. Sidoo kale, waxaa jiri doona waddooyin shaqo oo hubin doona kor u qaaddida iyo tayeynta macallimiinta.

## Baaxadda Siyaasadda

Siyaasaddani waxa ay khusaysaa nidaamka maamulka ee dhammaan macalimiinta dugsiyada hoose/dhexe iyo sare ee dawladda. Macalimiinta dhiga maaddooyinka ay markaasi baahidooda taagan tahay waxa la siin doonaa mudnaan gaar ah marka la joogo habka shaqaalaysiinta . Mudnaantu waxa ay gaareysaa degmada ama gobolka ay baahi macallin ka jirto.

## 3.1 Siyaasadda Diiwaangelinta

### 3.1.1 Maangalka Siyaasadda

Waxa jira tiro badan oo macallimiin ah oo hadda wax ka dhiga dugsiyada gaarka loo leeyahay, kuwa bulshada iyo kuwa dawladda oo aan wali la diwaangelin. Diiwaangelinta macalimiintu waa lagama maarmaan si dowladdu ay ula socoto tirada joogta iyo baahida macallimiinta ee dhammaan dugsiyada dalka. Diiwaangelinta kadib, waxa ay wasaaradaha waxbarashada dawlad goboleedyadu marin u heli doonaan xogta macallimiinta ee keydsan, gaar ahaan midda degaannadooda. Mu'asasadaha dugsiyada gaarka loo leeyahay waxa kale oo looga baahan yahay inay diwaangaliyaan macallimiintooda si macalimiinta diiwaangashan oo kaliya ay wax uga dhigaan dugsiyadaas si loo ilaaliyo tayada iyo hufnaanta xirfadda waxbaridda. Ujeedka guud ee siyaasaddani waa in dhididibbada loogu aaso tayada, hufnaanta iyo anshaxa xirfadda macallinimadu u baahantahay.

### 3.1.2 Murtida Siyaasadda

Dhammaan macallimiinta doonaya in ay ka shaqeeyaan dugsiyada hoose/dhexe iyo sare ee dalka waa in ay iska diwaangeliyaan Qaybta Diiwaangelinta iyo Shatiga Macallinka ee wasaaradda, kadib marka ay dhammeystiraan shuruudaha aqooneed ee macallinimada. Macallimiinta horey uga shaqeyn jiray dalka, waxaa la siin doonaa waqti cayiman oo ay iska diiwaangelinayaan qaybta. Muddadaa kadib, looma oggolaan doono inay sii wadaan macallinnimo ay kaga shaqeeyaan dalka gudihiisa.

### 3.1.3 Tallaabooyinka Siyaasadda

<u>Si loo dhaqangeliyo siyaasaddan, Dowladda Federaalka waxa ay adeegsaneysaa tabaha soo socda:</u>

1. Hubinta in diwaangalinta macalimiinta ay ku jirto hubinta aqoonta iyo shahaadooyinka xirfadeed ee macalimiinta iyo hubinta taariikh nololeedka, iyada oo lagu salaynayo shuruudaha qofka macallinka noqon kara (eeg qodobka ku jira siyaasada 2.3).
2. Hubinta in dhammaan shakhsiyaadka doonaya in ay noqdaan macallimiin ay ku asteysan yihiin hufnaan, oo aan lagu hayn fal-dambiyeed, maskax ahaan fayow, oo leh aqoon iyo xirfad shaqo.
3. Hubinta in gal-xogeedka macallimiinta lagu hayo Qaybta Diiwaangelinta iyo Shatiyaynta Macallinka, nuqul kalena lagu hayo Xafiiska Waxbarashaada Guddoonka Degmada oo ku xiran Waaxda Shaqada.
4. Hubinta in Hay'adda Shaqaalaha Rayidka iyo Wasaaradda Maaliyadda la siiyo qaybo ka mid ah xogta Diiwaangelinta Macallimiinta.
5. In la ilaaliyo halbeegyada xirfadeed iyo tayo ee mihnadda macallinimada, iyada oo la hubinayo in shakhsiyaadka aqoonta iyo xirfadda leh, qaateyna shatiga waxbaridda oo kaliya loo diwaangaliyo macallinimo.
6. In maamulka ay khuseyso loo fududeeyo qorshaynta taageerada xirfadeed ee macalimiinta, sida tababaridda, dallacsiinta, horumarinta xirfadeed ee joogtada ah, iwm.
7. Hubinta in dhammaan dugsiyada, kuwa gaarka loo leeyahay ama kuwa dawliga ah, ay qortaan oo kaliaya macallimiin tayo leh, diiwaan gashan oo shati haysta.
8. Hubinta in Nidaamka Maareynta Xogta Macallimiinta la dhisay, laguna xiray EMIS-ka wasaaradda.
9. In la diyaariyo madal la heli karo oo loogu talagalay macallimiinta mustaqbalka, si ay si fudud oo hufan isugu diiwaangaliyaan.
10. Soosaaridda lambarka diiwaan gelinta gaarka ah, kaas oo noqon doona calaamad fure u ah aqoonsiga macallin kasta oo nidaamka ku jira, shatina haysta.
11. In la hubiyo in macallinka diwaangashan uu haysto shati qaran oo xaq u siineysa in uu dalka ka shaqeeyo.
12. In bareyaasha aan tababarreyn, ee haysta ruqsadd kumeelgaarka ah, ay is-diiwaangeliyaan maadaama adeegyadooda loo baahan yahay gabaabsiga macallinimo awgiis, iyaga oo taageero ka heli doona macallimiinta khibradda leh iyo maamuleyaasha dugsigooda.
13. Baraha aan tababarreyn waxa la siin doonaa muddo (ku qeexan oggolaanshaha ku meel gaadhka ah) ay ku qaadan doonaan tababar shaqo si ay si buuxda diiwaanka u galaan, shatina

u qaataan.

14. Wasiirku waxa uu bixin karaa ogolaansho ku-meel-gaar ah ama ogolaansho xaddidan, inta la sugayo nidaamka diiwaangelinta iyo shatiga, si ay hay'ad waxbarasho u shaqaaleysiiso macallin aan shati haysan haddii loo baahdo.
15. Saraakiisha Tayadhawrka ee degmo kasta waxaa laga filayaa inay u sheegaan macallinkii aan ka diiwaangashanayn xafiiska waxbarashada degmada, si tallaabo looga qaado cid kasta oo jebisa siyaasaddan.

## 3.2 Siyaasadda Qorista Macallinka

### 3.2.1 Maangalka Siyaasadda

Dawladdu waxa ay hiigsanaysaa in ay xoojiso tayada macallinka. Sidaa darteed, sanadkii 2019, waxa ay fulisay cilmibaaris lagu qiimeeyey aqoonta iyo xirfadda macallinka. Qiimeynta macallinka iyo natiijadii imtixaanadii shahaadiga dugsiga sare ee fasalka 4aad ee 2018/2019 waxa ay muujiyeen in macallimiin badan oo shaqeeya tayadoodu hooseyso- haddii la fiiriyo dhanka xirfadaha barbaarineed iyo aqoonta maaddadaba (TPT, MoECHE 2019). Macallimiintu waa hoggaanka tayada, waana udub-dhexaadka hirgelinta manhajka. Haddaba, waxa ay danta iyo caqliguba inagu hagayaan in la shaqaaleysiiyo macalimiin tayo wanaagsan leh si loo daboolo baahiyaha waxbarasho ee dalka**.**

Intaa waxaa dheer, macallimiinta haweenka ah ayaa hadda ah kuwo aad u tira-yar, waxaana lagu dadaali doonaa in lagu dhiirigeliyo inay codsadaan goobaha waxbarashada. Shirweynihii Waxbarashada Qaranka ee dhawaan lagu qabtay Muqdishu ( SHWQ, 2023) ayaa ku taliyay in mudnaanta la siiyo qoritaanka macallimiinta hablaha ah.

### 3.2.2 Murtida Siyaasadda

Wasaaraddu waa in ay hogaamisaa tababaridda iyo diyaarinta tiro ku filan oo macalimiin tayo leh heer kasta oo waxbarasho ah, waana in la hubiyaa in dhammaan gobollada loogu adeego si siman marka la qeybinayo macallimiinta. Macallimiinta ragga iyo dumarka ah ee haysta shahaadooyinka rasmiga ah iyo shatigu waa in ay helaan fursado iskumid ah oo shaqaaleysiineed, iyada oo laga fogaanayo nooc kasta oo takoorid ah.

3.2.3 Tallaabooyinka Siyaasadda

<u>Si loo dhaqangeliyo siyaasaddan, Dowladda Federaalka waxa ay adeegsaneysaa tabaha soo socda:</u>

1. In la sameeyo odoroska macallimiinta qoritaankooda loo baahanyahay, si kor loogu qaado qorshaynta iyo qoondaynta keydka macallinka, iyada oo la isku dubbaridayo maamullada waxbarashada heer gobol iyo degmo, isla markaana laga faa'iideysanayo xogta EMIS ee laga heli karo madasha xarunta dhexe ee wasaaradda.
2. In la hirgeliyo hannaan shaqaaleysiineed oo hufan, oo ay ku jiraan xayaysiis, xulasho & koobid, waraysi, doorasho, magacaabid, iyo, ugu dambayntiina in la geeyo musharixiinta ku guulaysta halka adeegyadooda looga baahan yahay.
3. Hubinta in unug shaqo-qoriseed (recruitment panel) la sameeyay, iyo in unuggu hayo

diiwaanka dhammaan marxaladaha kala duwan ee shaqo qorista laga soo bilaabo xayaysiisyada, liisaska la soo xulay, qiimaynta, ama qiimaynta codsadayaasha, waraysiga iyo ugu dambaynta la geeyo dugsiyada ay ka shaqeyn doonaan.

4. Daadejinta doorka maaraynta arrimaha macalimiinta ee dawladaha xubnaha ka ah dawladda federaalka. Hase yeeshee, waa in la hubiyaa in masuuliyiinta dawlad goboleedyadu ay dejiyeen habraac qeexan iyo agab ku filan maareynta macallimiinta kahor inta aysan la wareegin mas'uuliyadda.
5. In la sahmiyo hab-waxbarasho oo heerar kala duwan wax islabartaan, kaas oo micnehiisu yahay in hal macallin wax baro heerar kala duwan oo arday ah meelaha ay ka jirto macallimiin yaraantu, gaar ahaan miyiga, xoola-dhaqatada iyo xeebaha.
6. In la hubiyo in musharraxiinta macalliminta haweenka ah la siiyo mudnaanta marka shaq-qorista lagu jiro.
7. Hubinta in aan loo dulqaadan takoorka ku salaysan gobolka, jinsiga, qabiilka, ama naafanimada.
8. In la hubiyo in Qaybta Diiwaangelinta iyo Ruqsad-siinta Macallimiinta ay la shaqeeyaan Waaxyaha Maaliyadda iyo Shaqaalaha, si loo hubiyo shaqaaleysiin caddaalad ku dhisan oo daahfuran.
9. In la hubiyo gacan-ku haynta nuqullada khuseeya shaqa bixinta inta lagu jiro habka qorista, oo ay kamid yihiin: habraaca qoritaanka, liiska musharixiinta, foomamka codsiga, nuqullada shahaadooyinka musharixiinta iyo CV-yadooda, xaashida dhibcaha murashaxiinta, qoraalka qodobbada shirka, natiijada waraysiga, iyo shahaadooyinka caafimaadka ee laga keeney isbitaallada la aqoonsan yahay.
10. Hubinta in macallimiinta la magacaabay si degdeg ah loo geeyo meelaha baahidu ka jirto.
11. Xaqiijinta in haddii uusan jirin walaac amni oo macquul ah, macallinku inuu ka shaqeeyo meesha baahidu ka jirto ee loo diray.
12. Hubinta in hawlgelinta macallimiinta ay ku qotonto asaas, sida helitaanka agabka, saamigalka macallinka iyo ardeyga, gabaabsiga macallimiinta maaddooyinka manhajka qaarkood.
13. Hubinta in, marka macallinka la geeyo dugsiga, ay Xarunta Maamulka iyo Horumarinta Macallimiintu la xiriirto labada Waaxood ee Maaliyadda iyo Shaqaalaha, si loo hubiyo in macallinka cusub ee la qoray lagu darey Nidaamka Mushahar-bixinta Macallinka si lacagta macallinka dibudhac looga ilaaliyo.
14. In la faro maamuleyaasha dugsiyada in ay ka warbixiyaan imaatinka macallimiinta cusub ee la qoray; iyo, sidoo kale, xaalad kasta oo ku saabsan maqnaanshaha macallinka ama jirrada, iyada oo la isticmaalayo dukumentiyada ku haboon.

## 3.3 Hawlgelinta Macallinka

### 3.3.1 Maagalka Siyaasadda

Soomaaliya waxaa ka jirta maanta nabad-gelyo-xumo, oo macallinka waxaa la geyn karaa oo keliya degaannada amnigooda lagu kalsoon yahay. Waxaa hubaal ah in macalimiintu, sida dhammaan shaqaalaha kale, ay door bidaan in ay ka shaqeeyaan magaalooyinka, sababtoo ah

waxa ay ka heli karaan adeegyo kaladuwan sida isbitaallada, bangiyada, internet-ka, tas-hiilaadka madadaalada, adeegyada gaadiidka iyo xiriirka qoyska. Si kastaba ha ahaatee, Xarunta Macallimiintu waa in ay xaqiijisaa in macallimiinta la dirayo la maareeyo si loogu diro meelaha ay adag tahay in la gaaro, gaar ahaan meelaha miyiga ah.

### 3.3.2 Murtida Siyaasadda

Hawlgelinta macallimiinta waa in si taxadar leh oo xirfadaysan loo maareeyaa, iyada oo la tixgelinayo baahida degaanka iyo sida ay uga go'an tahay macallinka in uu adeego, si looga fogaado shaqo nicid iyo goosasho.

### 3.3.3 Tallaabooyinka Siyaasadda

Si loo dhaqangeliyo siyaasaddan, Dowladda Federaalka waxa ay adeegsaneysaa tabaha soo socda:

1. Hubinta in macallinka waqtigiisu buuxo uu bixiyaa ugu yaraan 26 saacadood oo waxbarid ah todobaadkii.
2. Hubinta in macallinka *waqtigiisu buuxo* uu bixiyaa ugu yaraan 2 saacadood oo adeeg guud ah todobaadkii.
3. In macalimiinta ay dowladdu maalgelisay ay dowladda u shaqeeyaan ugu yaraan afar (4) sano, haddii ay taasi dhici waydana waxaa macallinka laga doonayaa soocelinta kharashkii dowladda kaga baxay tababarkiisa.
4. In la dejiyo qorshe toban sano gudahood lagu joojinayo dugsiyada labada gelin ah.
5. In la dejiyo qorshe lagu kala saarayo xarumaha dugsiyada hoose-dhexe iyo kuwa dugsiyada sare saddex (3) sano gudahood, laga billaabo 2024.
6. In la qorsheeyo siinta dhiirigelin dhaqaale iyo gunnooyin ay ku jiraan gunnada guryeynta iyo gaadiidka, macalimiinta la geeyo meelaha ay adagtahay in la gaaro.
7. In laga fekaro abuurista Caymiska Macallimiinta Qaranka (ie, caafimaadka, hawlgabka) ee shaqaalaha shatiga leh.
8. In la qoondeeyo bixinta Horumarinta Xirfadeed Joogta ah, si loo dhiirigeliyo macallimiinta lagu qorey meelaha ay adagtahay in la gaaro.
9. In la sameeyo qiimeyn amniga iyo yarraynta khatarta lagu faaqidayo kahor inta aan la geynin macallimiinta goobaha colaadaha.
10. Kobcinta isdhexgalka macalimiinta khibrada iyo aqoonta leh iyo kuwa cusub, iyada oo loo marayo hagidda saraakiisha hubinta tayada.

11. In laga taageero macalimiinta kaabayaasha tiknoolajiyada iyo helitaanka intarneedka, si ay ugu kaashadaan waxbarida iyo barashada.

## 3.4 Siyaasadda Mushaharka Macallinka

### 3.4.1 Maangal Siyaasadda

Sababta ay shaqaaluhu ugu sii jiraan shaqada, inta badan, waa dakhliga ay ku helaan magaca mushaarka, si ay u daboolaan nolol maalmeedkooda. Hase yeeshee, sababo kala duwan awgood, macallimiinta Soomaaliya ayaa ah kuwo aan helin mushaaraad ku filan, mana laha hannaan la cabbiri karo oo mushaarkoodu ku dhisan yahay. Hadaba, waxa loo baahan yahay in la helo mushaar cayiman oo la siiyo macallimiinta ka shaqeeya dugsiyada hoose/dhexe iyo sare ee dawladda, mushaarkaas oo u dhigma shahaadooyinka iyo waayo-aragnimadooda.

### 3.4.2 Murtida Siyaasadda

Heerka mushaharka macallimiinta dugsiyada dawladda waa in lagu hagaa miisaan/qiyaas mushaar oo rasmi ah oo ku salaysan shahaadooyinka iyo khibradda macallinka.

### 3.4.3 Tallaabooyinka Siyaasadda

Si loo dhaqangeliyo siyaasaddan, Dowladda Federaalka waxa ay adeegsaneysaa tabaha soo socda:

1. In la dejiyo miisaan mushaar oo si qeexan u tifaftiran oo loogu talagalay shaqaalaha waxbaridda.
2. In dib-u-eegis lagu sameeyo miisaanka mushaharka macallinka shantii (5) sanaba halmar.
3. Hubinta in miisaanka mushaharka macallimiinta uu ku salaysan yahay shahaadooyin iyo khibrad la xaqiijin karo.
4. Hubinta in bareyaasha haysta ogolaanshaha waxbarida gaarka ah ee wasaarada (ku meel gaarka ah) ay qaataan 30% wax ka yar macalimiinta xirfadlayaasha ah ee dugsiyada hoose.
5. In la dejiyo habraac maamul oo qeexaya miisaanka mushaharka macalimiinta.
6. In gabi'ahaanba la joojiyo adeegsiga bareyaasha aan shatiga haysan laga billaabo Sebtembar 1, 2025.
7. In maamulaha iyo maamule ku xigeenka loo qoondeeyo gunna xileed rasmi ah.
8. In la hirgeliyo qiyaasta/miisaanka mushaharka la soo jeediyay laga billaabo Sebtembar 2025 (Lifaaq 2).

## 3.5 Siyaasadda Hogaaminta Dugsiga

### 3.5.1 Maangalka Siyaasadda

Caddaymo kaladuwan ayaa muujinaya in tayada madaxda dugsiyadu ay tahay saadaal muhiim u ah waxbarashada carruurta. Maamulaha wanaagsani waa xirfadle bixiya taageero waxbarid,

tababara oo lataliya macalimiinta, kobciya dareenka bulshada dugsiga, macalimiinta ka dhiga kuwo la qiimeeyo, oo ku dhiirrigeliya kuwooda kartida leh in ay ku raagaan xirfadda. Maamulaha dugsiga ayaa mas'uul ka ah badqabka bulshada dugsiga iyo, sidoo kale, anshaxa iyo habsami u socodka hawlaha dugsiga. Sidaa darteed, maamulayaasha waa in si taxadar leh loo xushaa, waana in la taageeraa inta ay ku jiraan shaqada.

### 3.5.2 Murtida Siyaasadda

Marka lagu daro xeerarka kale ee khuseeya, maamulayaasha waa in ay buuxiyaan dhammaan shuruudaha xirfadeed ee lagu qeexay siyaasaddan.

### 3.5.3 Tallaabooyinka Siyaasadda

Si loo dhaqangeliyo siyaasaddan, Dowladda Federaalka waxa ay adeegsaneysaa tabaha soo socda:

1. Hubinta in dugsi kastaa leeyahay maamule ka soo baxa dhammaan shuruudaha xirfadeed ee jagada, oo ay ku jiraan kuwan soo socda:
    a. Haysashada ugu yaraan shahaadada 1aad tacliinta sare (B. Ed).
    b. Ahaanshaha macallin shati xirfadeed leh
    c. Lahaanshaha ugu yaraan 6 sano oo waayo-aragnimo waxbarid ah.
    d. Lahaanshaha ugu yaraan saddex sano oo ku-xigeen maamulenimo ah.
    e. Haysashada warqad dhaqan/anshax wanaag.
2. In maamulaha lagula xisaabtamo tayada waxbarashada dugsiga, bedqabka, iyo anshaxa guud.
3. Hubinta in maamulayaashu ay bartaan oo hirgeliyaan siyaasadaha waxbarashada, habraacyada, iyo halbeegyada.
4. Bixinta horumarin xirfadeed iyo taageero ku filan maamulayaasha.

## 3.6. Siyaasadda Fasaxa, Is-casilaadda iyo Bedelka Macallinka

### 3.6.1 Maangalka Siyaasadda

Si la mid ah shaqaalaha kale, macalimiintu way iska casilaan adeega waxbaridda si ay u raadiyaan fursado kale; waxa ay codsadaan u wareejinta meelaha ay doortaan, waxayna u qaataan fasax sababo kaladuwan. Mar haddii aaney jirin siyaasad iyo habraac arrimahaan qeexaya, hay'adahaa shaqadu waxaa dhici karta in ay mararka qaar ku xadgudbaan xuquuqda macallimiinta marka ay go'aansadaan inay is-casilaan, ay soo gudbiyaan codsi bedel ama fasax in ay shaqada ka qaataan ay damcaan. Sidoo kale, haddii si'aan nidaam lahayn lagu dhammeeyo adeegyada macallimiinta, waxaa ka dhalan kara carqalad dhaawici karta waxbarashada ardayda.

### 3.6.2 Murtida Siyaasadda

Is-casilidda, bedelka iyo fasaxa maqnaanshaha macallinka waa in la raaciyaa xeerarka qaranka ee khuseeya, oo ay ku jiraan siyaasaddan iyo habraaceeda maamul.

### 3.6.3 Tallaabooyinka Siyaasadda

Si loo dhaqangeliyo siyaasaddan, Dowladda Federaalka waxa ay adeegsaneysaa tabaha soo socda:

1. Dejinta iyo dhaqan gelinta habraaca maamul ee xil ka qaadista, is-casilaadda, bedelka, iyo fasaxa shaqada oo faahfaahsan.
2. Hubinta in macallinka doonaya in uu shaqada ka tago uu bixiyo ogeysiis hal bil ah oo uu ku caddeynayo go'aankiisa. Hase yeeshe uu sii shaqeeyo bisha uu ogeysiiska bixiyey.
3. Hubinta in macallinka ku guul daraysta in uu soosaaro ogaysiis hal bil ah, uu bixiyo lacag u dhiganta mushaharkiisa aasaasiga ah ee halka bil ah, oo loo qaadanayo ogaysiis la'aanta.
4. Hubinta in macallinka is-casilay uu soo celiyo dhammaan hantida dugsiga oo uu ka helo fasax qoraal ah maamulaha dugsigiisa kahor inta uusan bixin.
5. In la hubiyo in macallimiinta doonaya in loo beddelo dugsi kale, oo ay isku heer yihiin, ay codsi u qoraan sarkaalka waxbarashada degmada, iyaga oo u sii marinaya maamulaha dugsiga ay hadda wax ka dhigayaan.
6. Hubinta in macallimiinta doonaya u wareejinta heerar waxbarasho ama goobo shaqo oo kale ay haystaan shahaadooyinka jagada ay codsadeen.
7. In loo sheego macallinka in bixinta shaqo wareejinta la codsaday ay ku xiran tahay sababaha bedelashada, meesha uu macallinku codsadey inuu boos ka bannaan yahay iyo saameynta ay ku yeelan karto shaqo wareejintu goobta uu hadda macallinku ka shaqeeyo.
8. Hubinta in sarkaalka waxbarashada degmadu uu 15 maalmood oo shaqo gudahood ugu soo jawaabo macallinka codsiga gudbiyey.
9. Hubinta in fasaxyada sharciga ah ka sokow, macallimiinta loo oggolyahay in ay qaataan fasax sannadeedka kadib dhammaadka sannad dugsiyeedka.
10. In la ogeysiiyo macalimiinta in ay ku qaataan dugsiga maalmaha hawlgalka, dawladduna waxa ay codsan kartaa maalmo dheeraad ah si kor loogu qaado xirfadda macallinka iyo tayada waxbarashada.
11. In lagu qeexo maalmaha hawlgalka inay yihiin maalin kasta oo aanay ardaydu dugsiga joogin, laakiin macalimiinta looga baahan yahay in ay joogaan dugsiga, oo ay ku jiraan maalmaha horumarinta xirfadaha macallinka iyo maalmaha qorshaynta.
12. Hubinta in maalmaha horumarinta xirfadaha macallinka iyo maalmaha qorshayntu ay ku cad yihiin jadwalka waxbarashada gobolka ama degmada.
13. In la dejiyo habraac maamul oo faahfaahiya fasaxyada gaarka ah, sida fasaxa ummusha hooyada ama aabbanimada iyo fasaxa jirrada.
14. Hubinta in macallimiinta dumarka ah la siiyo fasax ummuleed afar bilood ah, halka aabaha xaaskiisa ay ilmo dhashay uu heli doono fasax laba toddobaad ah.
15. In la dejiyo habraac maamul oo faahfaahiya fasaxa waxbarashada macallimiinta dawladda u shaqeya.

## 3.7 Siyaasada Anshaxa Macallinkaa

### 3.7.1 Maangalka Siyaasadda

Xirfadlenimo, hufnaan iyo hab-dhaqan wanaagsan ayaa muhiim u ah muuqaalka macallimiinta ee bulshada ay ka dhex shaqeeyaan. Sida lala socdo, doorka macallinku kuma koobna hirgelinta

Manhajka Qaranka oo kaliya, ee sidoo kale, waxa uu tusaale u yahay ardayda iyo bulshada loo dirayo inuu ka dhex shaqeeyo. Dhab ahaantii, macallinka bulshada dhexdeeda waxaa looga arkaa waalid ahaan, waxaana ardaydiisa loogu dhiibey daryeelkooda. Sidaa darteed, waxaa muhiim ah in la ogaado in hab-dhaqanka macallinku uu qayb ka yahay bixinta tayada waxbarashada iyo horumarinta ardeyda. Dhaqan xumada macallinku waxay saameyn taban ku yeelataa macallinka xirfadiisa iyo natiijada waxbarashada ardayda. Ujeeddada guud ee siyaasaddu waa in lagu beero anshaxa iyo xirfadda macalimiinta ka shaqeeya dhammaan dugsiyada. Siyaasaddan waxaa ku dhex jira habraacyo loo cuskan doono si loo toosiyo haddii macallinku jebiyo mid kamid ah qodobbada Xeerka Anshaxa Macallinka.

### 3.7.2 Muritda Siyaasadda

Macallimiintu waa inay raacaan dhammaan sharciyada dalka u yaalla, xeerarka waxbarashada iyo siyaasadda, oo ay ku jirto siyaasaddan. Intaa waxaa dheer, macalimiinta waxaa laga filayaa inay saxiixaan ballanqaad iyo xeer anshax oo lagu keydin doono gal-xogeedkooda.

### 3.7.3 Tallaabooyinka Siyaasadda

<u>Si loo dhaqangeliyo siyaasaddan, Dowladda Federaalka waxa ay adeegsaneysaa tabaha soo socda:</u>

1. Hubinta in macallimiintu helaan oo saxiixaan Xeer Xirfadeedka Anshaxa kahor inta aanay billaabin waxbaridda.
2. In la kobciyo hufnaanta xirfadeed ee macallinka lana ogeysiiyo macallinku in uu:
   b. abuuro jawi waxbarasho oo nabadgelyo, ixtiraam iy xasillooni ku salysan, islamarkaana lagu dhisay danaha iyo bahiyaha ardeyga.
   t. U sheego maamulaha dhammaan dembiyada iyo xadgudubyada uu arko, si maamuluhu tallaabo uga qaado, ama booliiska ugu gudbiyo, si uu baaritaanno sharciga waafaqsan ugu sameeyo.
3. La qeexo anshax-xumada xirfadeed ee laga yaabo inuu macallinku sameeyo sida:
   b. Caasinimo/amar-diiddo ama tixgalin la'aanta amarka sharciga ah ee uu bixiyo qof awood u leh inuu bixiyo amarkaas.
   t. Dayacaad ama taxadar la'aan ku timaada gudashada waajibaadkiisa.
   j. Isticmaalka khamriga ama maandooriyaha, sida qaadka, kuwaas oo dhammaantood hoos u dhigaya aqoonta iyo haybadda xirfadeed ee macallinka.
   x. Ku-takri-falka awoodda macallinnimo, oo uu kula kaco dadka hoos yimaada, asxaabta, ama ardayda.

   Kh. Ka hoos-maridda mustawaha waxqabadka ama halbeegga anshaxa

   d.ka maqnaanshaha shaqada fasax la'aan.

   r. Ku lug yeelashada fal dambiyeed ka dhaca gudaha ama dibadda dugsiga.
   s. xiriir jinsi oo shrciga khilaafsan ama duufsi isku day ah oo xiriir jinsi

4. Hubinta in maamuluhu uu si hufan u maareeyo qaybaha dugsiga, oo ay ku jiraan:

b. La shaqeeyo Guddiga Waxbarashada Bulshada ee dugsiga, si loo ilaalio anshaxa guud iyo nidaamka dugsiga.
t. Wax ka qabtaa, hagaajiyaa, oo maareeyaa dhammaan anshax-xumada macallinka, iyo, sidoo kale, waxqabadka baridda iyo waxqabd la’aanta labadaba.
j. Hubiyaa in nuqulka Nidaamka Anshaxa Macallinku diyaar u yahay macallimiinta si loo tixraaco.
x. Dhisaa guddi hoosaad ka kooban macalimiin khibrad leh iyo xubno kasocda guddiga bulshada si ay wax uga qabtaan dembiyada yar yar ee dugsiga, iyada oo la adeegsanayo tabo kaladuwan, si loo hagaajiyo dhaqanka macallinka, loona ilaaliyo xuquuqda ardeyda.

Kh. U soo sheegaa dembiyada culus ama xadgudubyada (jirka, galmada, ama shucuurta) ee macalimiintu geystaan hay'adda ay khusayso (wasaaradda, booliiska, iwm.)

5. Hubinta in ardaydu ay wax ku bartaan degaan bedqaba, daryeel, iyo jawi wanaagsan leh, waxaana kamid ah in uu:

b. Dejiyaa oo faafiyaa hannaan cad, oo bedqab oo loogu talagalay ka warbixinta dhaqammada baalmarsan xirfadda macallinka iyo xadgudubyada.

t.Baaraa cabashooyinka ardayda, iyada oo aan eex lahayn.

j.Ilaaliyaa daryeelka iyo sirta ardayda ka dacwooda macallinka iyo daryeelayaasha kale.

x.In la dhiso guddiyo anshaxeed oo heer dugsi iyo heer wasaaradeed ah:

kh. Guddiga anshaxa ee heer dugsiyeedka ayaa wax ka qabta arrimaha yaryar waxayna sameeyaan warbixino hordhac ah oo ku saabsan dhacdooyinka dugsiga.

d. Gudiga heer wasaaradeed waxaa hogaaminaya xarunta macalimiinta oo taageero ka helaysa waaxda Shaqada iyo xafiiska Agaasimaha Guud.

r. Marka guddiga anshaxa ee heerka dugsi ay kulmaan oo ay go'aan ka gaaraan dacwad ka dhan ah macallinka, go'aanka iyo dhammaan arrimaha la xiriira kiiska waa in loo gudbiyaa Xarunta Maamulka iyo Horumarinta Macallinka, iyada oo la mariyo xafiiska guddoonka waxbarashda degmada.
s. Warbixinta heerka hoose (dugsiga) waa in ay la socdaan dukumeentiyada soo socda:
  i. Cabasho qoraal ah
  ii. Foom lagu qoro eedeymaha macallinka ka dhanka a ah.
  iii. Warbixinta baaritaanka
  iv. Hadal kasta oo ka soo baxa markhaatiyaasha
  v. Hadal kasta oo macallinka soo gudbiyey.
  vi. Shir-qoraallo iyo go’aanno ka soo baxay Guddiga Anshaxa

Sh. Isaga oo ku raacaya caddaymaha, guddi heer wasaarad ah ayaa xaqiijin kara, diidi kara, ama beddeli kara go'aannada ay soo jeediyeen guddi kasta oo kale oo heerar dugsi ama degaan ah.

x. Go'aanka guddigan oo qoraal ah waa in la siiyaa macallinka ay khuseyso, iyo, sidoo kale, dugsiga iyo guddi anshaxeed kasta oo hoose oo ku lug leh kiiska.

7. In loo maamulo shaqo-ka-joojinta iyo ka cayrinta macallinka hannaan xurmeyn iyo xirfadlenimo ku dheehan tahay:

b. Hubi in sirta iyo sharafta macallinka shaqada laga cayriyey la ilaaliyo.
t. Hubi in caddaynta iyo warbixinnada ku saabsan anshax xumada macallinka lagu eedeeyay ay yihiin kuwo sir ah.
j. Fahan in shaqo ka joojinta ay dhici karto kahor ama kadib eedeynta macallinka, iyada oo loo marayo guddiga anshaxa ee ay khuseyso.
x. Awood u sii Guddiga Anshaxa ee Wasaaradda in ay shaqada ka eryaan macallinka fal-dambiyeed culus uu ku caddaaday oo kaliya.

Kh. Hubi in shaqo ka joojinta uu meesha ka saarey guddigii shaqa ka joojintu kadib markii ay go'aan ka gaaraan kiiska, oo ay ku soo gabagabeeyaan natiija ah in aan anshax xumada caddeymo ku filan loo hayn.

d. Caddee haddii aan faldambiyeed lagu helin, in macallinka shaqada laga joojiyey laga jari karo qayb ka mid ah mushaharkiisa taas oo uu go'aamin doono guddigu.

r. Hubi in tallaabooyinka anshax-marinta ee laga qaaday macallinku ay raacaan tilmaamaha hoose:
s. Shaqo ka joojintu waxa ay dhici kartaa kahor (inta la sugayo baarista) ama kadib marka lagu soo oogo faldambiyeedka, macallinkana waxaa shaqada ka saari kara guddiga anshaxa heer wasaaradeed.

Sh. Afar iyo toban maalmood (14) gudahood ayaa dacwad lagu soo oogi; haddii kale, shaqa joojintu way dhammaaneysaa.

c. Guddiga anshax marinta heer wasaaradeed waxa uu ogolaan karaa in lagu kordhiyo muddada shaqa ka joojinta (hakinta) ugu badnaan saddex bilood, iyada oo lagu salaynayo go’aanka sabab macquul ah wata.
    f. Shaqa-ka-joojintu waxay dhammaaneysaa haddii macallinka aan wax gaf ah lagu helin ama muddada u xaddidan dacwa soo oogiddu ay dhammaato.
    q. Marka macallin lagu soo oogo inuu galay “fal-dambiyeed", macallinka waxaa shaqada ka joojin kara guddiga anshaxa ee heer gobol.

## 3.8. Wadiiqaha Kobcinta Xirfadda Macallinka

### 3.8.1 Maangalka Siyaasadda

Jiritaanka qaabdhismeed xirfadeed ama wadiiqo u oggolaanaya horumar xagga xirfadda macallinka ayaa muhiim u ah soo jiidashada, dhiirigelinta iyo sii haynta macalimiinta. Arrinkaasi waxa uu qeyb ka noqonayaa in la dhiso macallinniin leh aqoonta, kartida iyo hufnaanta lagama maarmaanka ah, si kor loogu qaado waxbarashada. Kobcinta horumarka xirfadda waxaa ka dhalan kara soo jiidashada macalimiin khibrad iyo karti leh, oo lataliya, islamarkaana tababara macallimiinta cusub. Wadiiqaha xirfadeysan ee shaqadu, waxa kale, oo uu saameeyaa haynta macallinka, maadaama macalimiinta ay dhiiri galiyaan suurtagalnimada horumarka. In kasta oo wadiiqaha xirfadeysan ee shaqada loo arki karo in uu qaali yahay, haddana wuu ka kharash yar yahay siinta tababbarka macallimiinta ka taga isla marka ay shaqada billaabaanba, iyaga oo hanti iyo waqti badan lagu bixiyey.

### 3.8.2 Murtida Siyaasadda

Maamulka waxbarashadu waa in uu deijyaa oo hirgeliyaa wadiiqo xirfadeed shaqo oo macalimiinta siinaya abaal-marin iyo dhiirigelin macno leh, mid dhaqaale iyo mid aan dhaqaale ahaynba, si loogu dhiirigaliyo macalimiinta sii wadidda horumarka.

### 3.8.3 Tallaabooyinka Siyaasadda

Si loo dhaqangeliyo siyaasaddan, Dowladda Federaalka waxa ay adeegsaneysaa tabaha soo socda:

1. Ku toosinta Hurumarinta Xirfadeed ee Joogtada ah (HXJ) xaglaha kaladuwan ee ka dhex jira wadiiqo xirfadeedka shaqada macallinka, si ay macalimiintu u helaan horumar xirfadeed nidaamsan, taageerana horumarkooda shaqo.
2. kadhiggidda wadiiqo xirfadeedka shaqada mid loo siman yahay oo u ogolllanaya macallinmiinta oo idil fursado loo siman yahay dhanka horumarinta shaqada.
3. Hubinta in horumarka shaqadu uu ku astaameysan yahay tayo iyo daah-furanaan ku saleysan shuruudo loo siman yahay oo ku saabsan horumarinta iyo dalacsiinta.
4. Hubinta in wadiiqo xirfadeedka shaqadu ka tarjumayo baahiyaha nidaamka waxbarashada iyo duruufaha ku xeeran macallimiinta.
5. Ku daridda qaabdhismeedka xirfadeysan shuruudaha fasaxa shaqada iyo gelitaanka waxbaridda waqtiga dhimman iyo waliba qaabab kaladuwan oo shaqada loo gudan karo.
6. U diyaarinta macallimiinta horumar xirfadeed JIIF ah iyo mid JOOG ah labadaba.
7. U ogolaanshada macalimiinta in ay qaab sharcigu ogolyahay ugu biiraan ururada/iskaashatooyinka xirfadleyda ah ee ku habboon.

## 3.9 Dawladaha Doorkooda iyo Waajibaadkooda

### 3.9.1 Maangalka Siyaasadda

Nidaamka maamul daadejinta ee federaaliga ah, maamullada degmooyinka ayaa inta badan bixiya adeegyada aasaasiga ah sida waxbarashada. Hase yeeshee, Soomaaliya, ma cadda doorarka iyo kaalinta heerarka kala duwan ee dowladnimada u kala soohdimeysan yihiin. Intaa waxaa dheer, maamullada maxalliga ah ee Soomaaliya waxay la ildaran yihiin awood xumo iyo agab la'aan. Sidaa darteed, badi adeegyada dawladda waxaa maamula hay'adaha dawladda dhexe iyo dawladaha xubnaha ka ah.

### 3.9.2 Murtida Siyaasadda

Wasaaradda waxbarashada ee federaalka ayaa hogaamin doonta kobcinta jawi wada-shaqayneed oo ay la yeelato wasaaradaha waxbarashada dawladaha xubnaha ka ah, wada shaqeyntaas oo ku saabsan horumarinta nidaam cad oo lagu maareeyo macallimiinta dalka. Nidaamku waa inuu qeexaa doorarka iyo mas'uuliyadaha Wasaaradda Waxbarashada Federaalka iyo wasaaradaha waxbarashada dawladaha xubnaha ka ah ee ku saabsan waxbarashada iyo maareynta macallinka.

### 3.9.3 Tallaabooyinka Siyaasadda

Si loo dhaqangeliyo siyaasaddan, Dowladda Federaalka waxa ay adeegsaneysaa tabaha soo

socda:

1. Ku dareysaa arrimaha soo socda Mas'uuliyadaha Wasaaradda Waxbarashada Fedaraalka:
   a. Dhisidda iyo dayactirka culus ee Machadyada Tababarka Macallimiinta.
   b. Diyaarinta/tababarka macallinka
   c. Diiwaangelinta iyo rukhsad siinta macallinka.
   d. Mushaar siinta macallinka.
   e. Shaqo ka saaridda ama shaqa ka cayrinta macallinka, marka uu soo maro dhammaan habraacyadii loogu talogalay.
2. U qoondeyneysaa mas'uuliyadaha soo socda wasaaradaha waxbarashada dawlad goboleedyada:
   a. Hawlgelinta iyo meelaynta macallinka,
   b. Fasaxa macallinka (jirro, waalidnimo, waxbarasho, iwm.,) bedelka iyo maqnaanshaha.
   c. Kormeerka, la socodka iyo anshax marinta macallinka, oo ku eg shaqo ka joojin.
   d. Taageerada xirfadeed ee macalimiinta sida, latalinta, tdaadihinta iyo tababarka.
   e. Dayactirka fudud, nadaafadda iyo ilaalinta Machadyada Tababarka Macallimiinta
   f. Kharashka joogtada ah ee socodsiinta machadyada (korontada, biyaha, taleefanka, internetka, amniga, nadaafadda iyo bilicda).
3. Si qorsheysan ugu wareejineysaa wasaaradaha waxbarashada dowlad goboleedyada maamulidda macallimiinta, marka ay la yimaadaan caddeyn maamul iyo maaliyadeed oo ku filan.

# CUTUBKA AFRAAD

# HABKA DHAQANGELINTA SIYAASADDA

## 4.1 Doorka iskuxirka Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare

Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare ayaa ka mas'uul ah, lagalana xisaabtamayaa hirgelinta siyaasaddan. Wasaaraddu waxa ay isku dubarideysaa, oo kaashan doontaa daneeyayaasha kala duwan si loogu guulaysto hirgelinta siyaasadda, iyada oo la adeegsanayo hannaan guud oo ku aaddan bahda waxbarashada, oo ay ku jiraan jilayaasha ganacsiga gaarka loo leeyahay; bulshada rayidka ah; bahwadaagta horumarinta iyo hay'adaha cilmi-baarista. Wasaaraddu waxa ay:

1. Qorshe u dejineysaa miisaaniyadda iyo dhaqangelinta barnaamijyo kor u qaadaya horumarinta macalimiinta sida ku cad qodobada siyaasaddan.
2. Diyaarineysaa kormeerka, korjoogteynta iyo qiimaynta fulinta siyaasadda.
3. Hoggaamin dhisidda iyo iskuxirka shabakadaha, iskaashiga iyo wadashaqaynta dhammaan daneeyayaasha waxbarashada.
4. Ku baahineysaa siyaasadda dhammaan daneeyeyaasha waxbarashada.
5. Agaasinka cilmi-baaris siyaasadeed oo ku habboon barnaamijyada horumarinta macallimiinta.
6. Baahineysaa istiraatijiyadaha hirgelinta siyaasadda Macallinka.

Haddii hoos loo sii galo kaalinta wasaaradda waxbarashda, waxaa hawsha badankeeda qaadanya unugyada soo socda:

### 4.1.1 Xarunta Maamulka iyo Horumarinta Macallimiinta

Waaxda macallinku wax ay:

1. Shaqaaleysiineysaa macalimiin iyo bareyaal waxbarasho, heer walba ah, oo ay shati/rukhsad siisay qaybta diiwaangelinta iyo shatigu.
2. Ururin, keydin, oo ilaalinaysaa diiwaanka dhammaan macallimiinta dalka ka shaqeeya
3. Siineysaa fasax-waxbarasho shaqaalaha ku jira Adeegga Waxbarashada kadib marka uu soo-jeedin dhammaystiran soo gudbiyo xafiiska Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada ee dawlad goboleedku.
4. U hawlgaleysaa sidii wakiil loo idmada inuu aqoonsado Machadyada Waxbarashada Macallinka.
5. Maamuleysaa horumarinta xirfadeed ee macallimiinta.
6. La shaqeyneysaa mu'asasadaha dugsiyada leh iyo ururrada macalimiinta ee sharciga ku dhisan, si loo horumariyo jawiga shaqada macalimiinta.

7. Qiimeeyneysaa waxqabadka xarumaha waxbarashada, si loo ogaado kuwa mudan in la aqoonsado.
8. Iskudubarideysaa hannaanka qiimaynta waxqabadka macallimiinta.
9. Soo bandhigeysaa macallimiin ku dayasho mudan oo u qaabeysan maaddooyin, qeybo, dugsiyo, degmooyin, gobollo iyo heer qaran, si loo aqoonsado, loona abaalmariyo.
10. Ka qaadeysaa tallaabo anshaxeed dhammaan macalimiinta wax ka dhiga xarumaha dowliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay, haddii loo baahdo, iyada oo kaashanaysa wasaaradaha waxbarashada dawlad gobleedyada iyo Waaxda Tayadhawrka iyo Halbeegyada.
11. Kala talineysaa dawladda arrimaha la xiriira siyaasadda macallinka.
12. Dhisidda kadib, dejinayaa habraac iyo qorshe hawleed faahfaahsan
13. Ka shaqeynayaa si loo hirgeliyo Hannaanka Horumarinta Xirfadeed ee Joogtada ah ee u furan dhammaan macallimiinta.
14. Taageero u fidinaysaa machadyada tababarka macalimiinta ee dawlad goboleedyada.

### 4.1.2 Xarunta Horumarinta Manhajka Qaranka

Xarunta manhajku wax ay:

1. Dib u eegis ku sameyneysaa manhajka machadyada tababarka macalimiinta, si waafaqsan manhajka  dugsiyada hoose/dhexe iyo sare ee dalka.
2. Diyaarineysaa macallinka iyo ardayga agabkooda waxbarashada, oo ay kamid yihiin hageyaasha baridda iyo barashada.
3. Ku jihayneysaa macallimiinta manhajka cusub ama hagaha tababarka/waxbaridda.

### 4.1.3 Agaasinka Tayadhawrka & Halbeegyada

Agaasinku waxa uu:

1. Dib u eegis ku sameynayaa halbeegga macallinka, si loo xaqiijiyo soo saarista macallimiin taya leh.
2. U dejinayaa halbeegyo machadyada tababarka macallimiinta.
3. Hirgelinayaa kormeeridda macalimiinta iyo kormeerka guud ee dugsiga.

### 4.1.4 Xafiiska/Xarunta Imtixaanka

Xafiiska Imtixaanku waxa uu qaban doonaa, oo maamuli doonaa qiimaynta iyo cilmi-baarisyada la xiriira ujeeddooyinka siyaasadda.

### 4.1.5 Nidaamka Macluumaadka Maamulka Macallinka (TMIS)

Unugga TMIS waxa uu:

1. Horumarinayaa oo hawlgelinayaa nidaamka macluumaadka maamulka waxbarashada macallinka
2. Ururin, maamuli, falanqeyn, oo uu diyaarinayaa xogta macallimiinta si loogu adeegsado qaab ku habboon.
3. Hubinayaa in xogta macalimiinta, oo ay ku jiraan shahaadooyinka, waayo-aragnimada iyo diiwaanka anshaxa la hayo, oo si taxaddar leh loo ilaaliyo, si loogu isticmaalo maamulka

macallinka, oo ay ku jiraan hawlgelinta, beddelka, tayeynta iyo dallacsiinta, iyo, sidoo kale, warbixinnada hubinta tayada macallimiinta.
4. Dejinayaa istaraatijiyad TMIS qaran iyo halbeegyo, oo ay ku jiraan halbeegyada tayada xogta
5. Soosaarayaa tiro warbixino *elekteronik* ah iyo kuwo aan elekteronik ahayn, oo qorshaynta, go'aan qaadashada iyo ujeedooyinka kale oo maangal ah loo adeegsado.
6. Hogaaminayaa dib u eegista siyaasadda iyo habraacyada xogta qaran ee macallinka.

## 4.2. Doorka Wasaaradda Waxbarashada Dawlad Goboleedyada

Wasaaraduhu waxa ay:

1. Gacanta ku haynayaan liis shaqaale dugsi, oo si joogta ah loo cusubooneysiiyo, oo ka nadiif ah macallimiin tira buuxis (ghost teachers) ah.
2. Hawlgelinayaan macallimiin lagu qorey dugsiyo, sida ay hagayso mudnaanaha shaqaaleysiintu.
3. La soconayaan arrimaha shaqaalaha ee la xiriira fasaxa waxbarashada, fasaxa jirrada, fasaxa sannadlaha ah iyo hawlgabka.
4. U sheegayaan hay'adaha qaabbilsan baahiyaha shaqaale ee jira.
5. Hubinayaan in ay jirto isku dheelitir la'aan ku saabsan ragga iyo dumarka shaqaalayntooda.
6. Si joogto ah u qiimeynayaan shaqaalaha, oo u isticmaalayaan xogta ka soo baxda toosinta waxbarashada.
7. Ururinayaan baahiyaha shaqo ee jira, oo ku dhawaaqayaan boosas bannaan.
8. Adeegsanayaan warbixinnada qiimaynta shaqaalaha, si loo ogaado baahiyaha tababarka macallinka.
9. Adeegsanayaan foomamka qiimaynta macallinka, si loo aqoonsado loona abaalmariyo macallimiinta ku tilmaaman waxqabad ku dayasho mudan.
10. U fiirsanayaan macallimiinta aan shaqadooda loo bogin, tallaabo ku habboonna ka qaadan.
11. Kormeerayaan oo la soconayaan natiijooynka qiimaynta dugsiyada, si loo aqoonsado dhaqammada wanaagsan, loona soosaaro dugsiyada ku-dayashada mudan.

## 4.3. Doorarka iyo Waajibaadka Daneeyayaasha Waxbarashada

Daneeyeyaasha muhiimka ah waxaa kamid ah: Wasaaradda Maaliyadda; Jaamacadaha iyo Machadyada kale ee Sare; Bahwadaagta Horumarinta Waxbarashada; Waxbarashada Gaarka loo leeyahay iyo daneeyeyaasha kale ee muhiimka ah.

### 4.3.1 Jaamacadaha iyo machadyada kale ee sare

Jaamacaduhu waxa ay:

Sameynayaan cilmi baaris tacliimeed oo ku saabsan macallinka, si wax looga qabto caqabadaha ama daldaloollada dhaqangelinta siyaasaddan.

### 4.3.2 Wasaaradda Maaliyadda

Wasaaraddu wax ay:

1. Maalgelin doontaa hirgelinta siyaasadda, iyada oo la kaashanaysa hay'adaha horumarinta.

2. U abaabuleysaa ilaha dhaqaalaha, si waafi ahna u kordhin doontaa qoondada Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare, si loo taageero hirgelinta siyaasaddan.

### 4.3.4 Waaxbarashada Gaarka loo leeyahay

Hay'adaha Wabarashada Gaarka looleeyahay waxa ay:

Kala shaqayneysaa dawladda xagga waxbarashada si waafaqsan Siyaasadda Waxbarashada Qaranka, 2023, siyaasaddan iyo xeerarka kale ee la xiriira.

### 4.3.5 Bahwadaagta Horumarinta Waxbarashada

Bahwadaagta Horumarinta Waxbarashadu waxa ay:

1. Gacan ka geysaneysaa abaabulka ilaha dhaqaalaha, si loo xaqiijiyo dhaqangelinta qodobbada siyaasadda.
2. Bixineysaa kaalmo farsamo inta lagu jiro dhaqangelinta siyaasaddan.
3. Taageeri dib u eegista siyaasadda.

# CUTUBKA SHANAAD

## KORMEERKA, QIIMAYNTA, IYO DIB-U-EEGISTA SIYAASADDA

Tallaabooyinka iyo istiraatijiyadaha siyaasadda waa la kormeeri doonaa oo si joogto ah ayaa loo qiimeyn doonaa. Intaa waxa dheer, aalad kormeer iyo qiimayn ayaa siyaasdda loo dejin doonaa.

Iyadoo loo marayo Nidaamka Maareynta Macluumaadka Waxbarashada (EMIS) iyo Nidaamka Maareynta Xogta Macallimiinta (TMIS), waxaa la hubin doonaa ururinta, falanqaynta iyo faafinta xogta macallimiinta, si loo go'aamiyo horumarka laga gaaray hirgelinta siyaasadda. Xog ururinta iyo maaraynta waxaa loo adeegsan doonaa sahan xilliyeedka, tirakoobka barnaamijyada waxbarashada iyo habab kale oo loo go'aamin doono sida ku habboon. Tallaabooyinka siyaasadda iyo istaraatiijiyadaha ayaa loo qiimeyn doonaa qaab xilliyeysan, iyada oo la adeegsanayo qalabka kormeerka iyo qiimeynta, si loo ogaado saameynta, daldaloolada, arrimaha soo cusboonaaday iyo caqabadaha ku yimid fulinta. Siyaasadda waxaa laga yaabaa in dib loo eego marka ay soo baxdo baahida dib u eegistu. Hase yeeshee, wasaaraddu waxay dib u eegis rasmi ah ku samayn doontaa 5 sano kadib.

## GUNAANAD

Nidaamka waxbarasho ee Soomaaliya, oo wali dib-u-dhis ku socdo, waxa uu ku guulaysan karaa in loo helo ardeyda Soomaliyeed waxbarasho taya leh oo baahidooda aqooneed daboosha. Guushaas waxaa la gaari karaa marka la helo cudud macallin oo si wanaagsan u tababaran, kalsooni, karti iyo taageero leh oo laga filayo in ay hogaamiso hayaanka loogu jiro hiigsiga siyaasadda macallinka. Si hiigsigaa looga maradhaliyo, Wasaaradda Waxbarashda, Hiddaha iyo Tacliinta Sare waxa ay dejisay Siyaasadda Macallimiinta ee heer qaran si ay u bixiso habraacyo iyo xeerar ku saabsan horumarinta iyo maamulka macallimiinta oo loo arko inay yihiin hantida ugu muhiimsan ee dugsiyadeennu haystaan. Nuqulkani waxa uu sheegayaa caqabadaha ay la kulmaan macalimiinta hadda iyo fursadaha u bannaan bahwadaagta waxbarashada Soomaaliya. Siyaasaddu, waxaa kale, oo ay soo bandhigtay habraacyo ku saabsan diyaarinta/tababarka macallinka, shuruudaha laga filayo dadka kusoo biiraya xirfadda macallinnimada iyo tababarrada kaladuwan ee la qorsheeyey in macallimiin taya leh lagu soosaaro. Intaa waxaa dheer, habraacyada maamulka, hogaanka iyo mushaarsiinta kadib marka iyaga oo xirfadleyaal shati haysta la hawlgeliyo. Qeybaha ugu dambeeya ee siyaasaddu waxa ay tibaaxayaan dhaqangelinta, kormeerka iyo maaliyaadda siyaasadda.

# TIXRAAC


The Education Act, MoECHE.

The National Education Policy (Approved 2020)

ESA and ESSP, 2018-2021, MoECHE.

UNESCO Policy Development Guide (2015)

UNESCO SDG4 (2015)

World Bank 2013- What matters most for Teacher Policies: A framework Paper. Excerpts from teachers, Head Teachers, MoECHE/FMS MoE Policy Makers, Teachers' Union.

# LIFAAQYO

Annex 1.1 Primary Teacher Training Credits [check with the National Institute]

Ed. Psychology, measurement and evaluation, Technlogy as a subject, Ed Foundations,

| Subject | Contact Hours/Week | Credit Hours | Course Type |
|---|---|---|---|
| Somali | 2.5 | 2 | Subject matter |
| Arabic | 2.5 | 2 | Subject matter |
| English | 2 | 2 | Subject matter |
| Math | 2.5 | 2 | Subject matter |
| Science | 2.5 | 2 | Subject matter |
| Social Studies | 2 | 2 | Subject matter |
| PE | 2 | 2 | Subject matter |
| Edu. Administration | 2.5 | 2 | Professional Teacher Education |
| Islamic Studies | 2.5 | 2 | Subject matter |
| Inclusive Education | 3 | 3 | Professional Teacher Education |
| Ed. Research and Statistics | 3 | 3 | Professional Teacher Education |
| Edu. Technology | 3 | 3 | Professional Teacher Education |
| Teaching Practice | | 6 | Professional Teacher Education |
| **Total** | **30 hours** | **33 Credits Hours** | |

## Annex 1.2 Secondary Teacher Training Credits

| Category | Courses | Credits |
|---|---|---|
| Major | 18-20 | 72-80 |
| Minor | 8 | 32 |
| Sub minor | 5-7 | 20-28 |
| Professional Training in Education | 15 | 60 |
| **Total** | **60-63** | **230-238** |

| Profile | High School | Salary |
|---|---|---|
| 1 | An instructor/underqualified with a ministerial special letter of authority | $295.00 |
| 2 | B. Ed with Temp. License | $330.00 |
| 3 | B. Ed with full license | $382.00 |
| 4 | B. Ed with full license and # of years | $382+ $yrs+Ed. * |

## Annex 2: Teacher salary

| Profile | Primary School | Salary |
|---|---|---|
| 1 | An instructor with a ministerial special letter of authority | $250.00 |
| 2 | Ed. Diploma with Temp. License | $280.00 |
| 3 | ED. Diploma with full license | $330.00 |
| 4 | ED. Diploma with full license and # of years | $330+ $yrs+Ed. * |
| 5 | Deputy Head Teacher | Base+ # of yrs.+15% |
| 6 | Head Teacher | Base+ # of yrs.+25% |